JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE

ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند


| | | |
|---|---|---|
| Sannadka 5aad | Cadad Gaar ah | 22/06/2016 |


# XEERKA BAANKA DHEXE
# XEER LR. 54/2012


Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com


*Lama iibin karo*
*Not for sale*

*Sannadka 2016*

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

**JSL/M/XERM/249-1034/042012** **12/04/12**

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0229/042012

## Dhaqan-galka Xeerka Baanka Dhexe Xeer Lr. 54/2012

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:** | **Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;** |
| **Markuu Arkay:** | **Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;** |
| **Markuu Helay:** | **Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee ku suntan GW/G/KF-17/557/2012 ee 02/04/2012 ee Go'aanka Ansixinta Xeerka Baanka Dhexe Xeer Lr. 54/2012;** |

**Wuxuu Soo Saaray**

**Xeerkan oo lagu baahinayo dhaqan-galka Xeerka Baanka Dhexe ee Xeer Lr. 54/2012.**

**Allaa Mahad Leh,**
**Axmed Maxamed Silanyo**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# CUTUBKA 1'AAD

## QODOBKA 1AAD

## ERAY BIXIN

**Dawlad:** Waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Soomaliland

**Madaxweyne:** Waxaa loola jeedaa Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland

**Baan:** Waxaa loola jeedaa hay'ad jirta oo ku hawlan adeega bulshada ee qabashada lacagaha dhitada ah, si loo sameeyo amaah ama maalgashi.

**Cadeynta jeega:** Waxaa loola jeedaa in lagu bedelo qaadashada aalado lacag-bixineed ama qiimo kaydsan oo aan ahayn (traveler's check) oo lacag loogu bedelayo qofka keena aalada lacag-bixinta.

**Badeeco:** Waxaa loola jeedaa lacag, macdan, wax-soo-saar beereed ama badeecado ama hanti kale oo badeecad ahaan loogu cadeeyey xeer nidaam uu soo saaray Wasiirka Maaliyadda.

**Sarifka lacagta:** Waxaa loola jeedaa dakhliga laga helo marka lacag wadan leeyahay lacag kale loo bedelo.

**Damaanad deymeed:** Waxaa loola jeedaa aalad deymeed oo la sarifi karo, iyo aalad kasta oo kale la

mid ah aalada deymeed, haddii ay cadeyn wadato ama buug ku jirto.

**Derivative:** Waxaa loola jeedaa heshiis la kala iibsan karo oo qofka haysta xaq u siinaysa:

**a**. Inuu hantiyo damaanad ama badeecad ama damaanado ama badeecaddo ama

**b**. Inuu helo cadad lacag naqad ah lagu qiimeynayo qiimaha mustaqbalka ee damaanada ama badeecadda; ama c. inuu helo lacag naqad ah lagu qiimeynayo tixraaca heerka dheef korka ama qiimaha ay lacagta qalaad ee damaanadaha iyo badeecadaha.

**Saylad Maaliyadeed**: Waxaa loola jeedaa saylad lagu kala iibsado damaanadaha iyo hawlaha la xidhiidha sayladaa.

**Lacag qalaad iyo sarifka lacagta qalaad:** Waxaa loola jeeda: a. lacag uu wadan kale leeyahay, b. hal-beeg lacageed oo lagu sameeyey urur dawlado ka dhexeeya ama heshiis laba wadan iyo wax ka badan, c. dahab haddii loo iibiyo waslad ahaan oo aanay ku jirin qiimaha farshaxanka, ama d. isku darka wax kasta oo lagu soo sheegay a ilaa c.

**Maxakamada adeegyada maaliyada** Waxaa loola jeedaa maxkamada adeegyada maaliyadda ee lagu abuuray Qodobka 108'aad.

**Sariflaha lacagta qalaad:** Waxaa loola jeedaa qof ka ganacsada iibsiga iyo iibinta lacagaha qalaad, heshiisyada mustaqbalka, isku-bedel, heshiisyo damaanadeed oo ku lug leh lacag qalaad ama habaynta bixinta lacag qalaad.

**Heshiis hore loo soo dhigay (forward Contract)**: Waxaa loola jeedaa heshiis lagu iibinayo damaanad ama badeecad oo la soo hor mariyey

**Heshiis mustaqbalka:** Waxaa loola jeedaa heshiis hore loo soo dhigay oo leh qodobo iyo shuruudo isku si loo habeeyey oo lagu kala iibsado saylad maaliyadeedka

**Sanduuqa maalgashiga:** Waxaa loo jeedaa shirkad ka qabata Dadweynaha lacagta kuna maalgelisa damaanadaha.

**Heerarka xisaabaadka ee caalamiga ah:** Waxaa loola jeedaa heerarka xisaabaadka caalamiga ah ee u danbeeyey ee ay soo saareen Guddiga heerarka xisaabaadka caalamiga ah.

**Qiime lacageed (monetary value):**

Waxaa loola jeedaa shay wax lagu kala bedesho haddii lacag loo rogo karo iyo haddii kaleba.

**Lacag:** Waxaa loola jeedaa shay wax lagu kala bedesho kaas ay ogalaadeen ama qaateen Soomaliland ama wadan kale kalmadan wax ku jira xisaab hal-beeg lacageed leh oo ay abuureen urur dawlado ka dhexeeya ama heshiis laba wadan iyo wax ka badan.

**Adeeg lacageed:** Waxaa loola jeedaa badbaadinta, lacag gudbinta, cadeynta jeega (check cashing) ama lacag isku bedelka.

**Adeeg-bixiye lacageed: (money Service provider):** Waxaa loola jeedaa qof/hay'ad ku hawlan bixinta adeega lacageed.

**Gudbinta lacagta (money transmission)** Waxaa loola jeedaa iibinta ama soo saarista aaladaha lacag bixinta, qiime kaydsan, ama helitaanka lacag ama qiime lacageed oo la gudbinayo;

**Marka laga hadlayo aalad maaliyadeedka (Negotiable):** Waxaa loola jeedaa mulkiyadda aalada lagu wareejin karo saxeex oo aalada la saxeexo ama in buug lagu kala wareejiyo

**Heshiis aan waajibin (options contract):** Waxaa loola jeedaa heshiis qofku ku jira siinaya xaq laakiin aan ku waajibinayn inuu ku iibiyo ama ku iibsado cadad go'an oo ah

daamanad ama badeecad qiimo lagu heshiiyey ama ka hor taariikh cayiman.

**Aalad lacag bixineed:**
Waxaa loola jeedaa jeeg, jeeg la buuxiyo, jeega safarka, ama aalad kale oo lagu gudbiyo lacag ama wax qiime lacageed leh, haddii la warrejin karo iyo haddii kaleba, sifaha weedhan kuma jirto warqadda badeeco-keenista (letter of credit), ama aallad cidda soo saartaa ay ku bedelan karto badeecad ama adeeg.

**Hab bixineed:**
Waxaa loola jeedaa hab ama isu-duwid kale (oo ay ku jirto shabakadaha isgaarsiinta) oo u dhexeeya saddex ama ka badan oo adeeg bixiye lacageed ah ee socodsiinta bixinta ama hawl fududeynta ama dhaqdhaqaaqyada deynbixinta ama isku-bedelka bixinta qaamaha maaliyadeed ama damaanadaha ee lacag kasta lagu bixinayo.

**Hawlwadeen hab lacag bixineed**:
Waxaa loola jeedaa qof ka hawlgala habka lacag bixineed

**Shakhsiyaad**: Waxaa loola jeedaa qof, shakhsiyad sharci, Dawlad iyo Wakaalad ama qaab dawladeed, qayb-hoosaad siyaasadeed

**Kayd qoraal (record)**: Waxaa xog lagu qoray shay la taaban karo ama lagu keydiyey elektroonik ama lagula soo bixi karo qaab la fahmi karo.

**Daamanad:**

Waxaa loola jeedaa aallad maaliyadeed oo la wareejin karo (shahaado ha wadato ama hala diwaangeliyo) ee mid ka mid ah qaybaha soo socda: a. saamiyo, ama shahaado iyo rasiidho la xidhiidha saamiyo; b. daamanad-daymeed ha loo bedeli karo ama yaan loo bedeli Karin saamiyo;
c. heshiis hanti maaliyadeed ku xidhan; saamiyo ama unugyo ka qaybqaadasho sanduuq maalgashi; aallad maaliyadeed kasta oo la wareejin karo oo uu damaanad ahaan u caddeeyey xeer nidaamka Baanka Soomaliland.

**Adeeg damaanado (Securities Service):**

Waxaa loola jeeda adeegyada ku taxan Qodobka 94 aad ama lagu caddeeyey inay yihiin adeeg damaanado.

**Adeeg bixiye damaanadeed (security service Provider):** Waxaa loola jeedaa qof ku hawlan inuu bixiyo adeega damaanaha.

**Habka wareejinta Damaanadaha.**

Waxaa loola jeedaa hab ama isu-duwid kale oo ay ku jirto shabakadaha isgaarsiinta oo u dhexeeya saddex ama ka badan oo adeeg bixiye damaanadeed ah wareejinta damaanadaha ama hawl fududeynta ama dhaqdhaqaaqyada deyn bixinta ama bedelka damaanado lagu bedelayo

lacag bixin ama damaanado kale oo lacag kasta lagu bixinayo.

**Hawlwadeen habka wareejinta damaanadaha:** Waxaa loola jeedaa shakhsi ka hawlgala habka wareejinta damaanadaha; "Saami" waxaa loola jeedaa qayb ka mid hantida shirkada ama damaanad lahaansho oo shirkadi soo saartay.

**Wakaalad Dawladeed:** Waxaa loola jeedaa wakaalad ama ganacsi gacanta dawladda ku jira ama wakaalad dawladeed.

**Qiime kaydsan (stored value):** Waxaa loola jeedaa qiime lacageed oo laga ogaan karo kayd-xoogeed Elektaroonik ah.

### QODOBKA 2'AAD
### MAGACA XEERKA

**Xeerkan** waxaa Loo aqoonsanayaa **Xeerka Baanka Dhexe ee Jamhuuriyada Somaliland**

## CUTUBKA 2'AAD
### QODOBKA 3'AAD
### SII JIRITAANKA IYO MEEQAAMKA SHARCI EE BAANKA

1. Iyadoo aan la eegin tirtiridda sharciga lagu abuuray Baanka Dhexe ee Somaliland. Jiritaanka hay'ad ahaaneed ee lagu qaabeeyey xeerkii la tirtiray magaca Baanka Dhexe ee Somaliland wuu sii jirayaa, waxaana lagu

dhaqayaa Xeerkan, Baanku waa uun kii lagu qaabeeyey Xeerkii la tirtiray.

2. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu leeyahay shaqsiyad sharci oo awood buuxda u leh marka la eego sharciga Somaliland inuu qandaraaso, hantiyo ama uu iska wareejiyo hanti ma-guurto ah ama guurto ah inuu soo saaro damaanadihiisa ama haddii kale amaahdo iyo inuu dhinac ka noqon karo dacwad maxkamadeed.

3. Baanku wuxuu yeelanayaa dhamaan hantidii awal hoos iman jirtay (Baankii dhexe ee Somaliya) sida Baanka Ganacsiga iyo kaydka iyo Baanka horumarinta ee ku yaala Gudaha Somaliland.

5. Baanka Dhexe ee Somaliland wuu dhisi karaa xafiisyo laamo, xafiisyo wakiil ama xafiisyo xidhiidh iyo inuu magacaabi karo wakiil tabiyeyaal **(correspondents)** meelo ka mid gudaha Somaliland ama dibadaba iyo inuu wax-qabad iyo hawlo u cayimo.

6. Xeerka Baanka dhexe ee Somaliland waxaa saldhig **(applicable law)** u ah shareecada Islaamka iyo Dastuurka Somaliland

7. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu ku dhaqmayaa axkaamta shareecada Islaamka ee maaliyadeed, maamul iyo hawl galineed isagoo tix galinaya curfiga hay'adaha maaliyadeed ee caalamiga ah.

8. Maadaama saldhiga, maamulka iyo adeega Baanka Dhexe ee Somaliland yahay shareecada Islaamka waxa reeban amaah kasta oo soo jiidaysa manfac dulsaar.

## QODOBKA 4'AAD

## UJEEDOOYINKA IYO WAAJIBAADKA AASAASIGA AH EE BAANKA SOMALILAND

1. Ujeedada ugu muhiimsan waa inuu gaadho joogteeyona degenaanshaha sicirka gudaha.
2. Waa inuu kobciyo dareerinimada (liquidity) rasamaalka iyo si habboon u shaqaynta hab maaliyadeed saylad ku dhisan deggani iyo kor u qaadida habka lacag bixinta qaranka oo ammaan ah wax-qabad fiicana leh.

3. Iyadoon wax loo dhimayn ujeedadiisa ugu muhiimsan ee ah inuu ilaaliyo degaanshaha sicirka gudaha, Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu taageeraa siyaasadaha guud ee dhaqaalaha dawladda Somaliland waxna ku kordhiyo Koboca dhaqaale joogta ah.

4. Waajibaadka asaasiga ah ee Baanka Dhexe ee Somaliland si gaar ah mas'ul uga noqonayaa waa inuu :-

   b) Sameeyo, qaato iyo inuu fuliyo siyaasadda lacagta ee Somaliland.

   t) Sameeyo qaato iyo inuu fuliyo siyaasadda sarifka lacagaha qalaad iyo nidaamka lacagaha la isugu bedelo ee Somaliland.

j) hayo oo maamulo kaydka lacagaha qalaad ee Somaliland

x) Daabacaa, soona saaraa lacagta waaraaqaha iyo qaadadiicda Somaliland.

Kh) Habeeyo lacag bixinta ama isweydaarin (clearing) iyo dhaqdhaqaaqyada deyn bixinta iyo lacag bixinta la isticmaalayo lacago kala duwan, deyman maaliyadeed ama damaanado ee lacag kasta.

d) noqdaa Baanka xukuumada, iyo la taliyaha xaga lacagaha

r) ruqsad siiyo, ama diiwaangeliyo iyo inuu nidaamiyo, korjoogana Baananka, sariflayaasha lacagaha qalaad, adeeg bixiyeyaasha lacagta, hawl wadeenada habka lacag bixinta, adeeg bixiyeyaasha dammaanadaha, hawlwadeenada habka wareejinta dammaanadaha iyo wixii kale ee loo soo gudbiyo inuu masuul ka noqdo ee waafaqsan xeerkan.

s) Qaabeeyo, qabyo tiro, korna u qaado habab lacag bixineed oo casri ah wax ku oolna ah, wareejinta damaanadaha ay soo saarto dawladu ama Baanka Dhexe ee Somaliland iyo habka isu gudbinta dhaqdhaqaaqyada lacag bixinta iyo dhaqdhaqaqyada la xidhiidha damaanadaha.

## QODOBKA 5'AAD

## AWOODAHA MADAX BANAAN EE BAANKA SOMALILAND

1. Marka uu gudanayo waajibadkiisa, Baanka Dhexe ee Somaliland awoodo madax banaan oo uu wax ku maamulo oo ay ku jirto inuu soo saaro shuruuc lagu fududeeyo dhaq-dhaqaaqyo nidaamsan oo awooda korontada **(electronic transections)** ku shaqeeya oo u dhexeeya Baanka Dhexe ee Somaliland iyo Baananka kale iyo macaamiisha ay kala leeyihiin.

2. Dhamaan shuruucda, tilmaamaha iyo amarada uu soo saaro Baanka Dhexe ee Somaliland ee ku aadan wax ka badan hal hay'ad waa in lagu daabacaa faafinta rasmiga ah waana inuu dhaqan galaa taariikhda ay faafinta ku soo baxda ama tariikhda kale oo lagu cayimo sharciga, tilmaanta ama amarka Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu geliyaa diiwan guud shuruucdaas, tilamaamahaa iyo amarradaa.

3. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu awood u leeyahay inuu geli karo xafiisyada baadhina karo, xisaabaha, Bugaagta, qoraalada iyo kayd-qoraal **(records)** Baanka, sariflaha lacagaha qaalaad, hawl wadeen hab lacag bixineed, adeeg bixiye lacageed, adeeg bixiye daamaanadaha, hawlwadeenka habka wareejinta damaanadaha ama qof kale oo ruqsad ka haysta ama ka diiwaangashan

Baanka Dhexe ee Somaliland si uu uga helo xog cidaas hadii Baanka Dhexe ee Somaliland u arko in xogtaasi lagama marmaan u tahay mas'uliyadiisa korjooganimo.

4. Marka uu isticmaalayo awoodihiisa ama uu gudanayo waajibaadkiisa sharcigu siiyey Baanka Dhexe ee Somaliland waa inu ka madax banaanadaa awood kale isagoo ku taagan ujeedooyinkiisa iyo inuu guto waajibaadkiisa, waa in dhammaan la ixtiraamaa madax banaanida Baanka Dhexe ee Somaliland, ciddina waa inaanay isku dayin inay saameyn ku yeelato ama farageliso hawlaha Baanka Dhexe ee Somaliland marka xubnaha go'aan gaadhista lihi ay gudanayaaan xilkooda.

5. Xubin kasta oo ka mid ah Guddiga Agaasimeyaasha iyo Guddiga fulinta iyo xubin kasta oo shaqaalaha ka mid ah waxa xil ka saaran yahay inuu kor u qaado sumcada Baanka Dhexe ee Somaliland inuu yahay siyaasiyan Baan dhexe oo madax banaan si simana ugu adeegaya Somaliland oo dhan, waana in xubin kasta iska ilaalisaa wax xilkaa ka hor imanaya.

6. Xubnaha Gudida agaasimayaasha Baanka dhexe ee Somaliland waxa ka reeban inay xubin firfircoon ka noqdaan arimo siyaasadeed intay xilka hayaan.

## QODOBKA 6'AAD

## ISKAASHIGA CAALAMIGA AH

1. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu Somaliland Wakiil uga noqonayaa kulamada dawladaha, golayaasha iyo hay'adaha khuseeya siyaasadda lacagta, ruqsad-bixinta iyo korjoogida baananka iyo waxyaabaha kale ee shaqadiisa ah.
2. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu bixin karaa adeeg Baan ee dawlado shisheeye, baanan dhexe oo shisheeye iyo hay'ado lacageed, waxaanu xidhiidh la yeelan karaa isaga ama dawlada wadashaqayni ka dhaxayso.
3. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu ka qayb qaadan karaa hay'adaa caalamiga ah ee ilaaliya degenaashaha dhaqaale iyo maaliyadeed iyadoo loo marayo iskaashiga lacageed ee caalamiga ah.
4. Isagoo wakiil u ah Somaliland, Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu qaadan karaa mas'uuliyado iyo inuu sameeyo kharashyada khuseeya ka qayb qaadashada Somaliland ee hay'ada caalamiga ah.

## CUTUBKA 3 'AAD
## ISKU DUBARIDKA IYO MAAMULKA
## QODOBKA 7'AAD
## QAABDHISMEEDKA BAANKA SOMALILAND

Qaab dhismeedka Baanka Dhexe ee Somaliland waxa uu ka koobnaanayaa:

1. Guddiga agaasinka (board of directers) oo ah unuga ugu sareeya ee siyaasadeed samaynta iyo go’aan qaadashada.
2. Gudoomiye, kaas oo u xil saaran maaraynta iyo hogaaminta guud ee Baanka Somaliland.
3. Gudoomiye ku xigeen iyo agaasime guud oo masuul ka ah socod siinta hawl maalmeedka.
4. Saraakiisha iyo shaqaalaha kale.

## QODOBKA 8’AAD

## HAWLAHA GUDDIGA AGAASIMAYAASHA

1. Guddiga agaasimayaashu waa inay mas’uul ka noqdaan hergilinta siyaasadaha muhiimka ah ee Baanka Dhexe ee Somaliland iyo Korjooganimada maamulka iyo hawlaha Baanka Dhexe ee Somaliland.
2. Marka ay hawlahooda fulinayaan Guddiga agaasimayaasha waa inuu muddo ilaa muddo qiimayn ku sameeya xaalada lacageed iyo dhaqaale. iyadoo la eegayo arintaa, guddoomiyuhu wuxuu uga warbixinayaa Guddiga agaasimayaasha maamulka iyo hawlaha Baanka Dhexe ee Somaliland muddo aan ka yareyn saddexdii bilood hal mar, dhaqan galka siyaasada lacagta iyo hagidda ( oo ay ku jirto degenaashaha sicirka gudaha) sugnaanshaha habka maaliyadeed oo ay ku jirto hababka lacag bixinta ee baananka Somaliland, iyo xaalad lacageed raassamaal iyo sayladaha lacagaha qalaad oo ay ku jiraan dhacdooyinka iyo xaaladaha la filayo inay saamayn ku yeesheen maamulka iyo hawlaha

Baanka Dhexe ee Somaliland dhaqangalka siyaasadiisa, habka maaliyadda ama sayladaha.

3. Agaasimaha guud waa inuu u bandhigaa Guddiga agaasimayaasha warbixinada iyo daraasadaha marka ay Guddiga agaasimeyaashu dalbadaan si ay u hagaan maamulka iyo hawlaha Baanka Dhexe ee Somaliland.
4. Gudoomiyaha waa inuu hubiyaa in xubin kasta oo Guddiga agaasimyaasha ah heshaa isla marka ay codsato xogtaa iyadoo ay xogtaa uga baahan yihiin inay ku maareeyaan maamulka ama hawlaha Baanka Dhexe ee Somaliland.

## QODOBKA 9'AAD

## AWOODAHA GUDDIGA AGAASIMAYAASHA

**G**uddiga agaasimayaashu waa inay yeeshaan awoodaha soo socda:

1. Inay sameeyaan hirgeliyaana siyaasadda lacagta ee Somaliland oo ay ku jirto xuduudaha uu Baanku sameynayo hawlgalada saylad furan iyo noocyada iyo heerarka dhigaalka ee Baananka looga bahan yahay inay ku yeesheen Somaliland.
2. Inay sameeyaan hirgeliyaana siyaasadda sarifka lacagaha qalaad iyo isku habaynta isku bedelka lacagaha ee Somaliland.
3. Inay hirgeliyaan shuruucda, tilmaamaha iyo amarrada guud ee uu soo saaro Baanka Dhexe ee Somaliland ee raacsan Xeerkan ama sharci kale oo jira.

4. Inay ogolaadaan dhammaan warbixinada iyo talooyinka uu Baanka Dhexe ee Somaliland ujeedinayo dawladda iyo Golaha Wakiiladda ee raacsan Xeerkan ama sharci kale oo jira.
5. Inay go'aamiyaan ka qayb qaadashada Baanka Dhexe ee Somaliland ee hay'ada caalamiga ah.
6. Inay go'aamiyaan qiimaha iyo naqshada ay lacagta waraaqaha ah iyo qaadaadiicda iyo shuruudaha lacag dib loogu soo xarayn karo.
7. Inay go'aamiyaan in Baanku soo saari karo damaanado deymeed iyo shuruudaha damaanadahaas.
8. Inay go'aamiyaan qaybaha hantida ku habboon in Baanka Dhexe ee Somaliland ku maalgashado dhigaalka lacagta qalaad iyo khayraadka maaliyadeed ee kale ee Baanka Dhexe ee Somaliland.
9. Inay oggolaadaan qiime dhinka Baanka Dhexe ee Somaliland ku sameeyo agabyada maaliyadda ee aanay u hadhsanayn muddo ka badan saddex bilood laga soo bilaabo markay Baanka soo galaan.
10. Inay ansixiyaan marka ay helaan ogolaanshaha shan meelood saddex meel ahaan xubnaha Guddiga agaasimayaasha ee jooga amaah kasta iyo damaanad kasta ee heshiis kale oo ku xidhan dhacdo Baanka Dhexe ee Somaliland u sameeyo danta Baanka ee waafaqsan Qodobka 88aad.
11. Inay hirgeliyaan shuruuc hoosaadyada Baanka Dhexe ee Somaliland iyo shuruucda

ku habboon maamulka iyo hawlgalada Baanka Dhexe ee Somaliland.

12. Inay go'aamiyaan qaab dhismeedka Baanka Somaliland si waafaqsan Xeerkan.
13. Inay ansixiyaan adeeg soconaya oo ay siinayaan gudoomiyaha, gudoomiye ku xigeenka iyo agaasimaha guud hay'ad maaliyadeed.
14. Inay abuuraan iyo inay xidhaan furuucda laamaha iyo wakaaladaha Baanka Dhexe ee Somaliland.
15. Inay go'aamiyaan iibsiga, dhismaha isticmaalka iyo iibinta dhismayaaasha iyo dhulka banaan ee uu leeyahay Baanka Dhexe ee Somaliland, si waafaqsan shuruucda dalka.
16. Inay go'aamiyaan miisaniyadda Baanka Dhexe ee Somaliland, shuruudaha shaqaalaynta kuna jirto gunnada hawlgabka ee shaqaalaha, wakiilada xidhiidhiyeyaasha Baanka Dhexe ee Somaliland ee aan ka ahayn Guddiga agaasimayaasha.
17. Inay soo jeedinayaan kordhinta raasamaalka la ogaalaaday ee Baanka.
18. Inay go'aamiyaan siyaasadaha xisaabta iyo siyaasadaha maareynta khataraha maaliyadeed ee Baanka Dhexe ee Somaliland.
19. Inay ansixiyaan warbixin sanadeedka iyo waraaqaha xisaab xidhka ee Baanka Dhexe ee Somaliland.

20. Inay go'aamiyaan qiime dhaca hantida iyo qadarka qiime dhaca hantida Baanka Dhexe ee Somaliland, iyo in loo sameeyo dhigaal gaar ah Baanka Dhexe ee Somaliland,
21. Inay go'aamiyaan faa'idada saafiga ah ee Baanka Dhexe ee Somaliland, iyo inay go'aamiyaan xaddiga faa'idada ee loo wareejinayo dhigaal kale.
22. Inay soo saaraan shuruuc, hab-dhaqano, heer-beeg, mabaadii iyo tilmaamo loola jeedo xeer nidaaminta, horumarinta, ama qabyo tirka suuqa lacagta, suuqa sarifka, suuqa heshiisyada, suuqa damaanadaha.
23. In la abuuro shirkado loola jeedo:
    - B) Tababarka, cilmi baadhista iyo horumarinta shaqaalaha.
    - T) Bixinta la talin maaliyadeed, maareynta adeega deymaha iyo waxbarashada maareynta maaliyada.
    - J) Qaabeynta sanaadiiq maalgelineed taasoo ay soo marinayaan hay'adaha maaliyadda.

## QODOBKA 10'AAD
## HABDHISKA GUDDIGA AGAASIMAYAASHA

1. Marka Golaha Wakiiladu ansixiyaan, Guddiga agaasimayaasha waa inay ka koobnaadaan xubnaha soo socda:
    - B) Gudoomiye
    - T) Gudoomiye ku xigeen
    - J) Agaasime Guud

X) Xubno aan ka yarayn 5 kana badnayn 8, xubnood oo kale, waxaana lagu soo magacaabayaa sida ku cad Qodobka 11aad ee soo socda.

2. Dhammaan xubnaha Guddiga agaasimayaasha waxa magacaabaya Madaxweynaha JSL Somaliland.
3. Guddidu waa inay lahaataa:
   B) Guddi hantidhowr.
   T) Guddiga khataraha iyo degenaanshaha maaliyadeed.
   J) Guddiga siyaasada lacagta iyo maalgelinta.

4. Guddiga agaasimayaasha Baanka waxa ansixinaya Golaha Wakiilada waxaana lagu ansixinayaa aqlabiyad hal dheeri ah ka dib markay ka soo talabixiyaan gudida dhaqaalaha Gollaha Wakiiladu.

**QODOBKA 11'AAD**

**XUBINIMADA SHURUUDAHA GUDIDDA AGAASIMAYAASHA**

Qof kasta oo loo magacaabay inuu ka mid noqdo Guddiga agaasimayaasha waa inuu ku sifoobaa shuruudaha soo socda:

B) Inuu yahay muwaadin Somaliland
T) Inuu yahay qof shaqsiyad wanaag lagu yaqaano
J) Inuu leeyahay waxbarasho Jaamacadeed iyo khibrad shaqo ugu yaraan 5 sano ah,

khaasatan dhinaca dhaqaalaha, baananka ama sharciga.

X) Waa Inaanu shaqaale ka ahayn Baanka Dhexe ee Somaliland marka laga reebo Gudoomiye, Gudoomiye ku xigeen ama agaasime guud.

KH) Waa in aanu xubin ka ahayn Guddiga korjoogeyaasha ama hay’ad maaliyadeed oo kale nooca ay doonto ha noqotee.

D) Waa inaanu Baanka Dhexe ee Somaliland ku korjoogin (Supervision) si sharci ah.

R) Waa inaanu xubin ka ahayn Golaha Wasiirada xubin baarlamaanka ah ama sarkaal sare oo dawladda ka tirsan.

**QODOBKA 12’AAD**

**XAQSIINTA XUBNAHA GUDDIGA AGAASIMAYAASHA**

1. Madaxwaynaha ayaa go,aaminaya mushaharooyinka ,gunooyinka iyo xuquuqaha Gudoomiyaha, G/xigeenka iyo Agaasimaha Guud ee Baanka kadib marka uu soo jeediyo Gudoomiyaha Baanku
2. Gudoomiyaha Baanka ayaa Go,aaminaya gunooyinka fadhi ee xubnaha kale ee Guddida Agaasimayaasha (board of directors)

**QODOBKA 13’AAD**

**U QALMID LA’AANTA IYO KA SAARISTA XUBNAHA GUDDIGA AGAASIMAYAASHA**

1. Madaxwaynaha Somaliland wuxuu ka joojinayaa shaqada ama ka saarayaa Guddiga

gudoomiyaha, gudoomiye- xigeenka agaasimaha guud iyo mid kasta oo Guddiga ka mid ah haddii xubintaasi:-

B) Xubintaasi buuxin weydo shuruudaha ku xusan Qodobka 11

T) Lagu helay dembi uu ku mutaystay xabsi dembigaas oo aan ahayn mid uga yimi xagga diintiisa ama afkaar siyaasadeed oo uu aaminsan yahay.

J)Inay xubintaasi tahay mid masulafay oo maxkamadi cadaysay inaanu iska bixin Karin daynka lagu yeeshay.

X) Shantii sanno ee u danabaysay inaanu maamule ama sarkaal ka ahayn shirkad lala wareegay.”

Kh) Lagaga fadhiisiyey ama lagaga eryey shaqadii uu hayey anshax xumo.

D) Awoodi weydey inay gudato hawshii xafiiska muddo lix bilood ka badan iyadoo ay sabab u tahay caafimaad darro xagga jirka ah ama maskaxda ah.

R) Haddii uu sabab la’aan ka maqnaa laba ama ka badan oo
Xidhiidha fadhiyada Guddiga agaasimayaasha Baanka Dhexe ee Somaliland ee la qabtay laba iyo tobankii bilood ee u danbeeyey.

S) Intii uu ka mid ahaa gudidga agaasimayaasha in uu ku xad gudbay

sharci ama waajibaad uu sharcigu soo rogay ama uu galay hawlo siyaasadeed ama sameeyey anshax xumo intii uu xafiiska joogay taas oo waxyeelaynaynasa danaha Baanka Soomaliland.

2. Waa in aan xubin ka mid ah Guddiga Agaasimayaasha shaqada lagaga joojin ama lagu eryin waxaan ka ahayn sida lagu sheegay Farqada 1aad.
3. Waa in aan xubin ka mid ah Guddiga Agaasimayaasha laga joojin ama laga saarin shaqada ka hor intaanu Madaxwaynuhu dacwadiisa dhegeysan iyadoo xubintaas ama Wakiilkeeda sharci inuu soo bandhigayo doodiisa.

## QODOBKA 14'AAD

## IS CASILAADA XUBNAHA GUDDIGA AGAASIMAYAASHA

Gudoomiyaha, Gudoomiye-kuxigeenka, Xubnaha Guddiga Agaasimayaasha iyo Agaasimayaha guud waxay iska casili karaan hawsha xafiiska iyagoo Madaxweynaha qoraal ku ogeysiinaye muddo aan ka yarayn saddex bilood ama muddo ka yar haddii Madaxweynuhu taa ogolaado. Xubin kasta oo kale oo guddigu ka mid ah waxay casilaadeeda qoraal ahaan ugu gudbinaya madaxweynaha muddo aan ka yareyn bil ama muddo ka gaaban haddii Madaxweynuhu sidaa ku raaco.

## QODOBKA 15'AAD

## JAGADA KA BANAANATA GUDDIGA AGAASIMEYAASHA

Jagada ka banaanaata Guddiga Agaasimayaasha waa in lagu buuxiyaa magacawga xubin cusub si waafaqsan Qodobada 10 aad iyo 11 aad waana in xubintaasi hawsha wada muddadii u dhinayd xubinta ay bedeshay.

## QODOBKA 16'AAD

## KULAMADA GUDDIGA AGAASIMAYAASHA

1. Gudoomiyuhu markuu maqan yahay ama uu awoodi waayo inuu guddoomiyo, fadhiyada waxa gudoominaya Guddiga agaasimayaasha Guddoomiye-ku-xigeenka.
2. Guddiga agaasimayaashu waa inay kulmaan saddexdii biloodba mar ama in ka yar haddii loo baahdo.
3. Sida caadiga ah, kulamada Guddiga agasimayaasha waxaa lagu qabanayaa go'aanka guddoomiyaha ama ku xigeenkiisa markuu maqan yahay waxaa kale oo kulamada lagu qaban karaaa marka ay codsi qoraal ah saddex xubnood ku codsadaan.
4. Kulamada Guddiga agaasimayaasha waa in la qabtaa iyadoo xubnaha oo dhan lala socodsiinayo waqtiga, goobta iyo ajendaha kulanka toban cisho ka hor marka la qabanayo kulanka
5. Xubin kasta oo Guddiga ka mid ah waxay leedahay hal cod. Tirada Guddiga ee kulan

qabsan karaa waa kala badh tirada guud oo hal lagu daray iyadoo uu joogo gudoomiyaha ama ku-xigeenkiisa

6. Ilaa si kale xeerkani u sheego, go'aamada waa in lagu qaatàa cod hal dheeri ah, codadka ay dhiibteen xubnaha kulankaa jooga. Waxa xaq u leh xubnaha shaqsiyan ku sugan kulanka oo keliya. Marka ay isleekaadaan codadku gudoomiyaha ayaa codskiisa ku kala saaraya
7. Marka la eego tirada kulan qabsan karta farqada 5aad, waa in aan go'aamada Guddiga loo burin keliya inay jirto xubin banaan ama xubno banaan

**QODOBKA 17'AAD**

**DOODAHA, QORAAL-SHIREEDYADA IYO GO'AAMADA GUDDIGA**

1. Agaasimaha guud ee Baanku waa inuu xoghayn uu noqdaa Guddiga agaasimayaasha
2. Doodaha kulamada Guddiga agaasimayaasha waa inay noqdaan qarsoodi.
3. Guddigu agaasimayaashu waxay go'aamin karaan dhammaan qayb ahaan doodahooda in dadweynuhu ogaan karo.
4. Waa inuu kasoo baxa kulan kasta oo ay yeeshaan Guddiga agaasimayaashu qoraal shireed oo uu saxeexo qofka guddoominaya kulanka ama xoghayaha Guddiga agaasimyaasha.
5. Go'aamada Guddiga agaasimayaasha waa in la kaydiyaa loona gudbiyaa hay'adaha ay khuseeyaan iyadoo xambaarsan saxiixa qofka

gudoominayey kulanka go; aamada lagu gaadhay.

## QODOBKA 18'AAD

## CADDEYNTA DANAHA GAARKA AH (DISCLOSURE OF INTEREST)

1. Xubin kasta oo ka mid Guddiga agaasimayaasha waa in marka la magacaabo iyo dabadeed sannad walba u cadeeyaa Guddiga agaasimayaasha Baanka Somaliland si buuxda danaha ganacsi ee si toos ah ama si dadban ee xubintaas ama qof qoyskiisa ka mid ah, ku yeelan karo shuruucda la qaatay.
2. Xubin ku leh dano ganacsi hay'ad uu Baanka Dhexe ee Somaliland korjooge ka yahay waa inay ka cadaysaa kulanka ugu horeeya ee ay timaado isla markay arrintaa ogaato.
3. Cadaynta ku xusan qayb-xigaha (2aad) waa in la geliyaa qoraal shireedka kulanka Guddiga cadaynta ka dib, xubintaasi:
   - B) Waa in aanay imman ama ka qayb qaadan doodaha iyo go'aamada Guddiga ee la xidhiidha dantaa uu cadeeyey ama aanu awoodiisa ku isticmaalin.
   - T) Inaan loo tixglein inay ka mid noqoto tirada ugu yar ee kulanka qabsan karta
4. Waa in la buriyaa ficil ama dood guddigu yeeshay iyadoo la eegayo in xubin jabiso sharciga sida ku xusan qayb-xige (2aad)
5. Xubinta ka baaqsata inay raacdo sida ku xusan qayb-xige (1aad) waxay ku jirtaa denbi, waxaanay waayaysaa xubinimada.

## QODOBKA 19'AAD
## GUDOOMIYAHA, GUDOOMIYE KU- XIGEENKA IYO AGAASIMAHA GUUD EE BAANKA SOMALILAND

1. Iyadoo ku xidhan ansixinta Golaha Wakiilada madaxweynaha Jamhuuriyadu waa inuu magacaabaa Gudoomiyaha muddo Shan sanno ah, dibna u soo magacaabi karaa mudadaas oo kale oo ah mudada ugu dheer ee gudoomiye la magacaabi karo.
2. Madaxweynaha Jamhuuriyadu waa inuu magacaabaa gudoomiye-xigeenka iyo agaasimaha guud, kuna eryi karaa shuruudaha ku xusan qodobka 21aad farqadiisa 3aad.
3. Xubin kasta oo Guddiga maamulka ka mid waa in lagu dhaariyo inuu ilaaliyo sirta maamulka iyo hawlaha Baanka Dhexe ee Somaliland iyo inay shaqadeeda u qabsato sidii loogu talagalay oo wax ku ool ah.
4. Guddoomiyuhu wuxuu mas'uul uga yahay Guddiga agaasimayaasha fulinta go'aamada Guddiga agaasimayaasha iyo hagidda iyo gacan ku haynta maamulka iyo hawlaha Baanka Somaliland
5. Marka uu maqan yahay gudoomiyuhu ama awoodi waayo inuu shaqeeyo sabab kasta ha ku timaado, Gudoomiye ku xigeenka Baanku waa inuu maamulaa Baanka isagoo isticmaalaya awoodaha uu xeerkani siinayo Gudoomiyaha, Gudoomiye ku xigeenku wuxuu qabanayaa hawlaha kale ee uu u diro gudoomiyuhu.

6. Iyadoo ku xidhan maareynta guud ee gudoomiyaha, Agaasimaha Guud wuxuu mas'uul ka noqonayaa maamul maalmeedka iyo hawlgalada Baanka iyo maareynta shaqaalaha. Agaasimaha guud waa inuu qabtaa hawlaha kale ee gudoomiyuhu u diro.
7. Marka uu maqan yahay agaasimaha guud ama uu awoodi waayo, inuu soo shaqo tago sabab kasta ha ku timaadee, gudoomiyuhu waa inuu si ku meel gaadh ah u magacabaa mid ka mid saraakiisha sare si uu u wado shaqadii agaasimaha guud isagoo isticmaalaya awooda uu xeerkani siinayo agaasimaha guud.
8. Gudoomiyaha, Gudoomiye ku- xigeenka iyo agaasimaha guud waxa masuuliyadooda, go'aamadooda iyo waxay sameeyaanba kala xisaabtamaya gudida agaasimayaasha.

## QODOBKA 20'AAD
## AWOODAHA GUDOOMIYAHA BAANKA

1. Gudoomiyuhu waa inuu yeeshaa awoodaha aanay gaar u lahayn Guddiga agaasimyaashu. Iyadoo aanay ka baxsanayn awoodiisa, gudoomiyuhu waa inuu yeeshaa awooda uu baahan yahay inuu qaado dhammaan talloobooyinka uu ku maamulayo ama ku socodsiinayo hawlgalada Baanka Dhexe ee Somaliland.
2. Marka ay ansixiyaan Guddiga agaasimayaashu wuxuu dhammaan ama qaar awoodiisa u wakiilan karaa gudoomiye ku xigeenka ama agaasimaha guud ama qof kale oo shaqaale ah

una qalma ama wakiilada Baanka Dhexe ee Somaliland. Baanku waa inuu hayaa liiska ka kooban dadka saxeexooda la ogol yahay iyo sharaxa awoodooda oo dhamaystiran waana in dadweynuhu ogaan karaan marka ay u baahdaan.

3. Gudoomiyuhu waa madaxa fulinta ee Baanka iyadoo ku xidhan go'aamada siyaasadda guud ee Baanka waa inuu mas'uul ka noqdaa maareynta Baanka oo ay ku jirto isku dubaridka, magacawga iyo eriga shaqaalaha si waafaqsan shuruudaha shaqada ee ay dhigeen guddidu, xeerka shaqaalaha dawlada iyo awooda uu Baanku wax ku kharash garaynayo.
4. Gudoomiyuhu waa inuu noqdaa wakiilka koowaad ee Baanka isagoo taa ku dhaqmayana waa inuu awood u yeeshaa:

   B) Metelaada xidhiidhada uu la leeyahay hay'adaha kale iyo dawladda.

   T) Metelaaa qof ahaan ama isaga oo qareen u adeegsanaya dacwad uu Baanku qayb ka yahay.

   J) Saxeexa uu dad kale qandaraas uu Baanku galay la saxeexan karo, ballanqaadyo iyo damaanado uu Baanku soo saaray, warbixino, waraaqaha dheelitirka (Balance sheet), xidhiidhada iyo qoraalada Baanku uu si uun u galayo.

X) Igmashada awoodihiisa saraakiisha sare ee Baanka sida ku xusan farqada hore iyo xarfaha B), T), J), ee farqadan

5. Gudoomiyuhu wuxuu xaq u leeyahay in laga dhagaysto kulanada golaha wasiirada ama kulan kale oo wasiiro leeyihiin, markasta oo laga hadlayo arrimo khuseeyo lacagta, Baananka, Amaahda iyo Siyaasada sarifka.
6. Markasta oo gudoomiyuhu maqan yahay ama si ku meel gaadh ah u awoodi waayo gudoomiye ku xigeenku wuxuu awood buuxda u yeelanayaa inuu fuliyo shaqadii gudoomiyaha.

**QODOBKA 21'AAD**

**SHURUUDAHA MAGACAABISTA IYO U QALMID LA'AANTA**

1. Qofka noqnaya, gudoomiye, gudoomiye ku xigeen ama agaasime guud ee Baanka dhexe ee Somaliland waa inuu:
   b. Ahaadaa muwaadin Somaliland
   T. Yahay qof sharaf loo aqoonsan yahay
   J. Haystaa shahaado Jaamacadeed gaar ahaan dhaqaalaha iyo Lacagta, iyo khibrad shaqo oo ugu yaraan 5 sano ah.
   X. Aan shaqada looga reebin sida ku xusan Farqada 3aad.
   Kh. Ahayn sarkaal ama shaqaale waqti buuxa ama waqti dhiman, mushahar ha qaato ama yaanu qaadan ee ka tirsan Baan ama hay'ad maaliyadeed oo sharci u baneeyey

Baanka Dhexe ee Somaliland inuu dusha ka maamulo.

d. Ahayn xubin golaha wasiirada, xubin Golaha Wakiilada iyo guurtida ah ama sarkaal sare oo dawlada ka tirsan

GUDD EE GARYAQAANKA JSL

2. Madaxweynuhu wuxuu shaqada ka joojinayaa ama ka eryayaa Gudoomiyaha, Gudoomiye ku xigeenka iyo agaasimaha guud ee Baanka Dhexe ee Somaliland, , hadii uu:

b. Noqdo midaan u qalmin sida ku cad farqada 1'aad

t. Yahay mid dembi lagu helay, mutaystay xabsi, haddii aan dembigaasi la xidhiidhin diin ama fikrado siyasadeed sida ku cad qodobka 13'aad

J. Hadii uu musalafay ama uu bixin kari waayo daynkii lagu lahaa maxkamadina cadays

x. Waa inaanu madax ka ahayn 5-tii sanno ee u danbaysay shirkad lala wareegay

kh. Awoodi waayo inuu qabto shaqada xafiiska sababo caafimaad oo xaga maskaxda ama jidhka ah mudo lix bilood ka badan

**QODOBKA 22'AAD**

**SHAQAALAHA BAANKA SOMALILAND**

1. Intay u shaqeynayaan Baanka Dhexe ee Somaliland madaxda iyo shaqaalaha Baanka Dhexe ee Somaliland waa in aanu u shaqayn,

amaah ka raadsan Baan ama hay'ad maaliyadeed oo kale oo sharci u baneeyey inuu Baanka Dhexe ee Somaliland dusha ka maamulo.

2. Guddiga agaasimeyaashu waa inay meelmariyaan xeer-hoosaad ay ku habeynayaan xaaladaha shaqo iyo shaqaale ee Baanka Dhexe ee Somaliland.

## QODOBKA 23'AAD
## SHAQAALAHA BAANKA XIDHIIDHIYEYAASHA IYO WAKIILADDA

1. Guddiga fulintu waa inay magacaabi karaan eryina karaan shaqaalaha, xidhiidhiyaha iyo wakiilada Baanka Dhexe ee Somaliland si waafaqsan xeerarka la xidhiidha.

## QODOBKA 24'AAD
## ISKA HORIMAADKA DANTA

1. Gudoomiyaha, Gudoomiye ku-xigeenka iyo Agaasimaha Guud ee Baanka Dhexe ee Somaliland waa inay aqoontooda shaqo u huraan Baanka Dhexe ee Somaliland midkoodna aanu qaban shaqo kale mushahar ha lahaato ama yaanay lahaan.
2. Gudoomiye hore, Gudoomiye ku- xigeen- ama Agaasime guud ee Baanka Dhexe ee Somaliland waa innanu ka shaqo gelin hay'ad kale maaliyadeed oo uu Baanku maamulo muddo ku siman sannad marka ay ka tagaan Baanka Soomaliland.

3. Waa inaan qof shaqalaha Baanka midihi qaban shaqo talantaali ku ah shaqada Baanka, faa'iido ha u lahaato ama yaanay u lahayne ilaa marka hore ogolaansho qoraal laga helo Baanka Dhexe ee Somaliland.
4. Waa in guddoomiyuhu, gudoomiye ku–xigeen, Agaasime guud, sarkaal ama shaqaale ka tirsan Baanka Dhexe ee Somaliland aanu naftiisa u qaadan hadiyad ama amaah ama u qaadin qof ay isku qoys yihiin ama xidhiidh ganacsi ama maaliyadeed la yeelan haddii ay wax u dhimayso dhexdhexaadnimada uu shaqadiisa ku gudanayo.

**QODOBKA 25'AAD**

**SIRTA**

1) Qofka isagoo ah xubin Guddiga agaasimayaasha, Guddiga fulinta ama isagoo gudoomiye ah ama xubin kale oo shaqaalaha ka mid ah ama wakiil u ah Baanka Dhexe ee Somaliland aanu ogolaan in la helo, daboolka ka qaado ama baahiyo xog aanay ahayn in la wada ogaado, isagoo xogtaa ku helay waajibaadkiisa shaqo, marka laga reebo haddii maxkamada ama sharci u baahdo in xogtaa la bayaamiyo ama looga baahdo in la waafajiyo heshiis iskaashi oo lala gelayo hay'ad shisheeye waa in aan loo istcimaalin xogtaa dano shaqsi ah.

## CUTUBKA 4'AAD

## QODOBKA 26'AAD

## RAASAMAALKA

1. Raasamaalka la ogolaaday ee Baanka Dhexe ee Somaliland waa toban malyuun oo dollarka maraynka ama cadad intaa oo le'eg lagu ogaaday baadhis madax bannaan oo lagu sameeyey hantida iyo deymaha Baanka Dhexe ee Somalilandee raacsan qodobka 135aad ama cadad intaa ka badan oo ka dhalatay faa'iidada saafiga ah sida raacsan qodobka 28AAD.
2. Raasamaalka Baanka Dhexe ee Somaliland, Waxaa iska leh dawladda waana in an loo isticmaalin cid rahmaad, heshiis wax ku iibsi oo cid lala galo.

## QODOBKA 27'AAD

## XISAABINTA FAA'IIDADA SAAFIGA AH AMA KHASAARAHA SAAFIGA AH EE BAANKA SOMALILAND

Sannad maaliyadeed kasta, waa in xisaab ahaan lagu soo saaraa faa'iidada saafiga ah iyo khasaaraha & is waafajin xeerarka caalamiga ah ee xisaabAADka iyadoo noqonaysa wadarta dakhligaa hawlgalka ka soo baxa ee saafiga ah ama khasaaraha (oo ay ku jiraan saafiga faa'iidada la xaqiiqsaday iyo khasaaraha) iyo saafiga faa'iidada aan la xaqiiqsan iyo khasaaraha ka dib marka meel loo sameeyo:

B) Deymaha laga shaki qabo, qiime dhaca hantida iyo inta loogu tabarucayo sanduuq hawlgabka shaqaalaha.

T) Iyadoo ay ku xidhan tahay ogolaanshaha Wasiirka maaliyadda ujeedooyinka uu Baanka Dhexe ee Somaliland u arko lagama maarmaan wixii kale ee ay meelaynayaan.

## QODOBKA 28'AAD
## QOONDEYNTA FAA'IIDADA SAAFIGA AH EE BAANKA DHEXE EE SOMALILAND

1. Haddii Baanka Dhexe ee Somaliland helo faa'iido saafi ah sannad maaliyadeed, faa'iidada saafiga ah waa in loo qoondeeyaa sida soo socota:

   B) Qayb ka mid faa'iidada saafiga ah waa in lagu biiriyaa xisaabta raasamaalka heer gaarsiisaan boqolkiiba Shan iskudarka deymaha maaliyadeed ee ka muuqda waraaqda dheelitirka (balance sheet) ee Baanka Dhexe ee Somaliland ee soo baxday sannad maaliyadeed kaa dhammaadkiisa.

   T) Qayb ka mid ah faa'iidada saafiga ah, Waxaa loo isticmaalayaa damanadihii uu Baanka Dhexe ee Somaliland suuqa geliyey ee raacsan qodob 30'aad

   J)Qayb ka mid ah faa'iidada saafiga ah Waxaa lo qoondaynayaa dhigaalka guud ee uu hayo Baanka Dhexe ee Somaliland, dhigaalka guud Waxaa loogu talagalay inuu

dheeli tiro khasaaraha ku yimaada Baanka Dhexe ee Somaliland.

X) Qayb ka mid ah faa'iidada saafiga ah dhigaalka ujeedo gaar ah uu u sameeyey Baanka Dhexe ee Somaliland taas oo ku xidhan ogolaansho laga helo Wasaaradda Maaliyada.

KH) Hadhaaga faa'iidada saafiga ah ka dib qoondayntaas kor lagu sheegay Waxaa loo qoondaynayaa sida soo socota:- qoondayntaas hore Waxaa loo xisaabiyaa si iyadoo ka soo baxday dakhliga hawlgalka marka laga reebo hadii aan dakhliga hawlgalka lagu darin faa'iidada saafiga ah, qoondaynta noocaas Waxaa lagu xisaabinayaa si iyadoo kasoo baxday faa'iido aan la xaqiiqsan, hadhaaga faa'iidada saafiga ah waa in loo wareejiyaa dawladda afar bilood gudahood mudada ka danbeysa sannad maaliyadeedka. Hadhagaa saafiga ah ee faa'iidada qiimeyn aan laxaqiiqsan.

2. Iyadoo la raacayo ujeedada xeerka wadarta guud ee daynta ah ee Baanka waa in laga soo ururiyaa.

   b) Kaashka la hayo, qadaadiicda ama damaannadaha daymeed ee baanku bixiyey

   t) dheelitirka dhigaalada ee dhamaan xisaabaadka la qabyotiray ee

diiwaanka Baanka Somaliland uga furan dadka xisaabaadka ku leh.

## Qodobka 29'AAD

## QOONDEYNTA KHASAARAHA SAAFIGA AH

1. Haddii Baanka Dhexe ee Somaliland galo khasaare saafi ah sannad maaliyadeed, khasaaraha saafiga ah waa in loo qoondeeya sida soo socota:
   B) Haddii khasaaraha saafiga ahi uu ka kooban yahay khasaaraha shaqada socota iyo saafiga qiimeynta khasaaraha aan la aqoonsan, cadadka saafiga ee khasaaraha shaqada socota waa in la geliyaa dhigaalka guud ama raasamaalka sida ay u kala horeeyaan, iyo cadadka qiimeynta khasaaraha aan la aqoonsan waa in loo qoondeeyaa xisaabta qiimeynta dhigaalka ama haddii qondeyntaasi ka dhigayso hadhaaga xisaabta qiimeynta dhigaalka mid taban qiimeynta khasaaraha aan la aqoonsan Waxaa loo qoondeynayaa dhigaalka guud ama raasamaalka sidaa ay u kala horeeyaan.
   T) Haddii khasaaraha saafiga ahi yahay isu-geynta saafiga dhakhliga hawlaha kana badan qiimeynta khasaaraha aan la aqoonsan, khasaaraha saafiga ah Waxaa loo qoondeynayaa xisaabta qiimeynta dhigaalka ama, haddii qoondeyntaasi ka dhigayso hadhaaga xisaabta qiimeynta dhigaalka mid taban, waa in la geliyaa

dhigaalka guud ama raasamaalka sidaa ay u kala horeeyaan.

J) Haddii saafiga qiimeynta faa'idada aaan la aqoonsan ka yar yahay saafiga khasaaraha shaqada, khasaaraha saafiga waa in la geliyaa dhigaalka guud ama raasamaalka sidaa ay u kala horeeyaan.

**QODOBKA 30'AAD**

**BUUXINTA HOOS U DHACA RAASAMAALKA**

1. Qodobkani wuxuu ku aadan yahay markasta oo Baanka Dhexe ee Somaliland uu warqada odoroska dheelitirka uu qiimaha hantida ka yaraado wadarta deymaha lagu leeyahay iyo rasamaalka fayow, ama ay faa'iidadeeda saafiga ahi sannadka dhammaadkiisa dabooli kari weydo inay kordhiso boqolkiiba 5 (5%) isugeynta deymaha lagu sheegay qodobka 28^AAD ee xeerkan sida lagu muujiyey xisaabaheeda dhamaadka sannad maaliyadeedka.
2. Haddii duruufaha lagu sheegay farqada 1'aad ay dhacaan iyo haddii qiyaastii u danbeysay ee qadar sannadeedka sicir bararku yahay 3% ilaa 20% waa in Wasiirka Maaliyaddu ka dib marka loo soo gudibyo warqadda dheelitirka uu siiyaa Baanka Dhexe ee Somaliland damaanado deyn oo suuq gal ah oo ku qiimeysan shillinka Somaliland oo ay dawladdu soo saartay, qiimaha lacagtooduna dabooli karayso hoos u dhaca. waa in baaxadda sicir bararka dib loo qiimeeyaa saddexdii sannaba. Hadii qiyaasta rasmiga ee sicir bararku ay ka baxsan tahay

qiyaasta 3% ilaa 20% Wasiirka maaliyadu waa inuu marka hore wax uga qorsheeyaa miisaniyada dawladda. Haddii aan cadadkaa loo qoondeeyey aan la ansixin, dabadeed waa in wasiirka maaliyadu bil gudaheed ka dib marka loo soo gudbiyo waa inuu siiyaa Baanka Dhexe ee Somaliland damaanad daymeed oo suuqgal ah oo ku qiimeysan shillinka Somaliland damaannadahaas oo ay dawladdu hoos u dhaca ku dheeli tirayso warqada dheelitirka.

3. Haddii duruufuhu sida ku cad farqada 1aad u dhacaan, Golaha Wakiiladu waxay isugu yeedhayaan guddi baadhitaan oo ay ku jiraan khubaro wadani ah iyo kuwa calami ah inay soo badhaan asbaabaha xaaladda haddii ay habboonaatana talo kasoo jeediyaan. Guddiga baadhista waa inuu ka helaa iskaashi buuxa Baanka Dhexe ee Somaliland, haddii uu baaqdo iskaashigaasi waxa la raacayaa shuruucda qodobka 13aad faqrada 1aad Xarafka - (R)

## QODOBKA 31'AAD

## XAKAMAYNTA QOONDEYNTA FAA'IIDADA SAAFIGA AH

1) Haddii talaabooyinkaasi sababayaan in hantida Baanka Somaliland ka yaraato wadarta daymaha raasamaalka iyo kaydka ma bannaana in la wareejiyo ama dib loo soo iibsado ama la bixiyo si waafaqsan qodobka 28aad

## CUTUB 5'AAD
## LACAGTA DALKA
## QAYBTA 1AAD

## LACAGTA WARAAQAHA AH IYO QADAACIIDA

### QODOBKA 32'AAD
### HAl-BEEGA LACAGTA QARANKA

Lacagta Somaliland iyo hal-beega lacagtaasi waa shilinka Somaliland oo astaantiisu tahay "SL.SH).

### QODOBKA 33'AAD

### SOO SAARISTA LACAGTA WARAAQAHA AH IYO QADAADIICDA

1. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu yeeshaa xaq u gaar ah oo uu ku dalban karo kuna soo daabacan karo lacagta waraaqaha ah iyo qadaadiicda uu ugu talagalay inay ku wareegto Gudaha Somaliland.
2. Soo saarista lacagta waraaqaha ee loo cuskado qodobkan waxay noqnaysaa waxa ugu horeeya ee laga jaro hantida Baanka Dhexe ee Somaliland.
3. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu qaban qaabo ku filan u sameeyaa daabacaada lacagta waraaqaha ah iyo qadaadiicda kuna sii daaya Xaruntiisa dhexe, laamihiisa iyo wakaaladihiisa Somaliland gudaheeda si ay ugu wareegto dhamaan gudaha Somaliland.
4. Lacagta waraaqaha ah iyo qadaadiicda uu Baanka Dhexe ee Somaliland soo saaro ee loogu talagalay inay ku wareegto gudaha

Somaliland ma ah deynsheeg, bill of exchange ama nooc kale oo qoraal ganacsi ah oo ku xusan sharciga ganacsiga, Baanka Somalilandna Waxaa ku waajibay inuu raaco sida farqadan ku Taal.

**QODOBKA 34'AAD**

**HESHIIS SHARCI AH**

1. Heshiiska lacag lagu bixiyo waa heshiis sharci ah, haddii lagu bixiyo lacag waraaqo ah ama qaadaadiic ah. Lacagta waraaqaha iyo qadaadiicda waa in lagu kala qaataa tirada ku qoran ee Shilinka Somaliland deymaha guud iyo kuwa gaarka ah ee gudaha Somaliland.
2. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu xadidi karaa cadadka lagu bixinayo lacagta waraaqaha ama qadaadiicda ama xayiro tirada lacagta waraaqaha iyo qadaadiicda in lagu bixin karo cadad cayiman.
3. Sida uu dhigayo qodobkani, tixraac kasta ee lacagta waraaqaha iyo qaadadiicda waxa loola jeedaa lacagta waraaqaha ah iyo qadaadiicda loogu talagalay inay ku wareegaan gudaha Somaliland ee lagu soo saaray si waafqasan qodobkan kuwaasoo aan lumin lacagninmadooda.

**QODOBKA 35'AAD**

**MUUQAALADA LACAGTA**

**1.** Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu go'aamiyaa, tirooyinka, hal beeg, qaabka warqada waxa ku qoran, miisaanka, naqshada

iyo muuqaalada kale ee lacagta waraaqaha iyo qadaadiicda.

2. Gudida agaasimayaasha Baanka dhexe ee Somaliland ayaa go'aaminaya tilmaamaha ku qoran farqada 1aad ee qodobkan waana inuu ka muuqdaa Lacagta waraaqaha saxeexa gudoomiyaha Baanka Dhexe ee Somaliland iyo lacag-hayaha guud ee Baanka Dhexe ee Somaliland, islamarkaana loo soo gudbiyaa Golaha Wakiilada si uu u ansixiyo.

## QODOBKA 36'AAD
## SOO SAARISTA IYO BADBAADINTA

1) Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu qabanqaabiyo daabaacada lacagta waraaqaha ah, samaynta, ilaalinta iyo badbAADada aan lacagta waraaqaha iyo qadaadiicda aan lasoo saarin, burburinta haddii loo baahdo agabka lacagta lagu daabacayo ama lagu sameeyo iyo lacagta waraaqaha iyo qaadiicda suuqa laga fadhiisiyey.

## QODOBKA 37'AAD
## BEDELKA LACAGTA

1) Marka la codsado, Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu lacagaha waraaqda ah iyo qadaadiicda ku bedelaa cadad le'eg oo lacag kale oo waraaqo iyo qadaadiica, iyadoo aan laga qaadayn wax khidmad ah.

## QODOBKA 38'AAD
## LACAG AAN HABOONAYN

1. Lacag waraaqo ah oo aan habboonayn ama qaadaadiic waa lacag waraaqo ah oo jeexjeexantay, masaxantay ama qadaadiic

qaloocasantay, dhaawacantay, masaxantay, miisaankeedii yaraysay wax aan aan ka ahayn xoqanka isticmaalku keenay.

2. Lacagta aan habbonayn ee waraaqaha ah ama qadaadiicda waa in laga saaraa lacagta wareegaysa. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu suuqa ka saaraa burburiyaa kuna bedelaa lacag waraaq ah iyo qaadaadiic tiro le'eg lacagta waraaqaha iyo qadAADiicda aan habbonayn
3. Baanka Dhexe ee Somaliland wuu diidi karaa inuu bedelo lacag aan haboonayn haddii naqshadeedu aan la fahmi Karin, qaabkii laga bedelay, la daldalooliyey ama dhammaanshaheeda 40% ay maqan tahay lacagta waraaqaha ah iyo qadaadiicda noocaas wa in suuqa laga xareeyaa lana baabiyaa iyadoo aan magdhow laga siinayn mulkiilaha, marka laga reebo xaalado gar ah oo Baanka Dhexe ee Somaliland ku bixin karo magdhow dhan ama qayb ah.
4. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu la wareegi karaa magdhow la'aan lacagta waraaqaha ee laga badelay muuqaalka dusha ama wax lagu dul qoray, rinji la mariyey, dabacaad kale la geliyey, la shaambadeeyey, la daldalooliyey taas oo dhalangedinaysa muuqaalka lacagnimadeedii.
5. Sarkaal kasta oo ka shaqeeya ururinta dakhliga gudaha Somaliland waa inuu u soo gudbiyaa Baanka Dhexe ee Somaliland lacag kasta oo aan habboonayn ama been abuur ah oo waraaq

ah ama qadaadiic ah oo uu xareeyey sarkaalkaasi.

**QODOBKA 39'AAD**
**KAYDKA LACAGTA IYO QORSHAHA LAGU SOO SAARAYO**

1) Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu toos u maamulaa kaydka lacagta caddaanka ah, sameeyaa qorshaha suuqa lagu soo gelinayo hubiyaana qaybinta lacag waraaqo ah iyo qadaadiic ku filan baahida dhaqaalaha Somaliland.

**QODOBKA 40'AAD**
**QAAB XISAABAADKA LACAGTA BAXAYSA**

1) Lacagta waraaqaha iyo qadaadiicda wareegeysa waa in xisaabaha Baanka Dhexe ee Somaliland loo geliyaa sidii oo ay tahay deyn lagu leeyahay Baanka Dhexe ee Somaliland cadeyntaas waa in aanay ku jirin lacagta waraaqaha ah iyo qadAADiicda kaydka ugu yaala Baanka Dhexe ee Somaliland.

**QODOBKA 41'AAD**
**SOO XARAYNTA LACAGTA**

1. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu go'aamin karaa in uu soo xareeyo ama ka saaro wareega lacag waraaqo ah ama qadAADiic una soo saaraa bedelka lacag u dhiganta qiimaha lacagta wareega laga saaray. Go'aanku waa inuu waafaqsan yahay nidaamka Baanka Dhexe ee Somaliland, kuwaas oo cayimaya goobta taariikhda iyo saacadda lacagta la isku

bedelay. Baanku waa inuu Bixiyaa wixii kale ee la xidhiidha nidaamka isku-bedelka lacagaha, Waxaanu shuruud u dhigi karaa sida loo ogaanayo dadka bedelanaya lacagta waraaqaha ah ama qadAADiicda ah iyada oo qoraal ahaan loo muujinayo dhaqdhaqaaqyada lacag isku badelka. Baanku waa inuu sameeyaa qaab uu ku ogaanayo lacagta been-abuurka ee loo keenay.

2. Dhammaadka xilliga lacag isku bedelka ee lagu sheegay farqada 1aad ama nidaam kale oo la cayimay, lacagta waraaqaha ah iyo qadaadiicda ee lacag bedelka lagu soo xareeyey waxa laga saarayaa lacagta wareega ku jirta.
3. Go'aanka ku xusan farqada 1aad waxaa loo isticmaali karayaa hirgelinta sharci ogolaanaya magacowga iyo tiro yareynta lacagta Somaliland ama ujeedo kale.

## QAYBTA 2AAD

## DHIGAALADA LACAGEED IYO BIXINTOODA

## (MONEY OF ACCOUNT AND PAYMENT)

### QODOBKA 42'AAD

### XISAABAADKA GUUD IYO LACAG BIXINTA KHASABKA AH

1. Dhammaan miisaniyadaha guud, keyd qoraalada maaliyadeed iyo xisaabAADka ee sharciga Somaliland jideynayo ee laga sameeyey yaallana gudaha Somaliland waxa lagu qiimeynayaa lacagta Somaliland. Lacag

bixinta ay waajib ka dhigtay go'aan dacwadeed oo aan ka ahayn fulinta qaan lacag qalaad waa in lagu sheega lacagta Somaliland.

2. Lacag bixinta khasabka ah waa in lagu qiimeeyaa laguna bixiyaa shilinka Somaliland. "Lacag bixinta khasabka ah" waa lacag la siiyey ama uu bixiyey xafiis dawladeed oo aan ka ahayn heshiis ama dhaqdhaqaaq ganacsi. waxaa ku jira bixinta cashuuraha (si toos ah ama mid dadban), cashuurta furdedaha, cashuurta wax soo saarka, fiiga iyo ganaaxyada iyo sidoo kale lacag bxinta adeegyada, lacagta lagu bixinayo amar maxkamadeed ama lacag bixin sharcigu jideeyey.

**QODOBKA 43'AAD**

**WADARTA SHARCIGA LAGU SHEEGAY QIIMEYNTEEDA IYO BEDELKEEDA**

1. Wadar kasta oo lagaceed oo xeer lagu sheegay, hadii aan si kale loo sheegin mooyaane, Waxaa loo macneysanayaa inay tahay lacagta Somaliland.
2. Haddii Xeer Somaliland, qaraar heshiis ay Somaliland qayb ka tahay aanu bixin sida Lacagta loogu bedelayo shillinka Somaliland, Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu saameynaya nidaam cayimaya sida loo hubinayo tirada shilinka Somaliland ee u dhiganta qiimaha lacagtaa qalaad.
3. Marka uu jiro go'aan lagu tiro-yareynayo lacagta si sharciga waafaqsan, kayd- qoraalada, xisaabaadka, qaamaha, deymaha, qiime

sheegtooyinka iyo tixraac xeer kale, waa in tirada lagu yareeyo si waafaqsan lacag isku bedelka tiro yareynta.

4. Hadii uu dhaco go'aan ku saabsan qiimodhimis lacageed oo waafaqsan Xeerkan, dhamaan xogaha, xisaabaadka, waajibaadka, daymaha, qaansheegaha iyo tixraacyo sharci kale waxa la waafajinayaa qiimodhimista si waafaqsan nidaamka qiimaha sarifka la yareeyey

**QODOBKA 44'AAD**

**HESHIISYADA**

1) Heshiis kasta, iib, lacag bixin, qaansheeg, ballanqaad agab ama daamaanad lacageed iyo dhaqdhaqaaq oo lacag la xidhiidha ama deyn lacag lagu bixinayo waa in lagu saleeyaa ama lagu fuliyaa shilinka Somaliland.

**QODOBKA 45'AAD**

**XORIYADDA LACAGTA**

1. Dhinacyada heshiis ama dhaqdhaqaaq isku dhaca oo ay ku jirto, qaansheegta, ballanqaad, agab ama damaanad lacageed waa in lagu qiimeeyo lacag kasta oo lagu heshiiyo.
2. Heshiiska darafyada ee waafaqsan qodobkan oo loogu sheegay si cad ama laga dheegan karo duruufaha ku gadaaman, oo ay ku jirto qaabka heshiisku u dhacay, adeegsi ganacsi ama qaabka loo fulinayo.

## QODOBKA 46'AAD

## FULINTA BIXINTA QAAMAHA LACAGAHA QALAAD

1. Qaanta Lacagta qalaad waxa la fulin karaa marka la helo shuruudaha ku xidhan. iyadoo loo eegayo farqada 3aad iyo 4aad halkaas oo shakhsiyad sharci ku waajibinayso inuu ku fuliyo qaan lacag qalaad iyo amarka looga baahan yahay in lacagta lagu bixiyo shilinka Somaliland in ku filan in lagu iibsado qaanta lacagta qalaad, tirada lacagta Waxaa xisaabinaya Baanka Dhexe ee Somaliland, xilliga rawaxaada maalinta qaanta la iibsanayo ee ka horaysa maalinta uu qaanta qaadanayo qaanluhu.
2. Haddii lacag lagu bixiyo sida ku cad farqada 1aad, qadarka lacag isku bedelka Waxaa lagu ogaanayaa sida lagu sheegay farqada 1aad.
3. marka dacwada in la bixiyo qaantaas lacag qalaad ee ay maxkamadu ku qanacdo bedelaada cadadka loogu bedelay shilin Somaliland sida ku cad farqada 1aad balse aanay u sinayn dhinacyadii amarku wuxuu dalban karaa bixinta cadadka lagaga iibsado Baanka Dhexe ee Somaliland qaanta lacag qalaad, maalin ay maxkamadu u garato inay dhinacyadu u siman yihiin. Maxkamadu waa inay amartaa in bedelaada lagu saleeyo qadar, uu qaanluhu lacagta dhammaanteed kuwada helayo iskana ilaalisaa in deysanaha lagu abaalmariyo qaanta uu la daahay.
4. Haddii qaanta laga fulinayo gudaha Somaliland bedelaada lacagta Somaliland loogu bedelayo

lacag qalaad si tilmaaman maxkamadu waa inay amartaa in sidaa tilmaaman loogu bedelo.

## QAYBTA 3AAD

## XADGUDUBYADA DEMBIGA AH

## (CRIMINAL OFFENCES)

## QODOBKA 47'AAD
## BEEN ABUURKA

**Lacagta been abuurka ah Waxaa ku jira:**

1. Lacag waraaq ah ama qadadiic been ah oo u eg ama loo qaatay lacag waraaq ah ama qadaadiic run ah.
2. Lacag waraaq ah loo macmalay ama waraaq cad oo lacag loo macmalay, ama ha dhammeystirnaato ama yaanay dhammystirnaane.
3. Lacag waraaq ah ama qadaadiic run ah oo la dhalan rogay si ay ugu ekaato lacag waraaq ama qadaadiic ka qiimo badan.
4. Qaadadiic xaradhka laga jaray, oo xaradh kale lagu sameeyey si ay muqaalkeedii loo soo celiyo.
5. Qadaadiic lagu dahaadhay dahab, qalin, ama nikel si loogu isticmaalo sidii dahab qalin ama nikel run ah.
6. Qadaadiic ama waslad macdan ah ama macdano isku jira oo waxyaabo kale lagu dhaqay si loogu eekeysiiyo dahab, qalin ama nikel. Been abuur ka dhinaca qiimaha "Counterfeit token of value) Waxaa looga jeedaa

shaambadaha rasiidhada shaambadaha boostada ama wax kale oo qiime lacageed u taagan oo lagu soo saaray iyadoo la marayo qabab kale duwan, oo ay ka mid tahay lacagta waraaqaha ah iyo qadaadiicda oo run ah, balse aan wax qiimo ah lahayn

## **QODOBKA 48AAD**
## **SAAMAYNTA LACAGTA BEEN ABUURKA**

1) Qof kasta oo sameeya ama isku daya inuu lacag been abuuro wuxuu ku jiraa dembi wuxuu u qoolan yahay xabsi ay amrayso maxkamada ku shaqada lihi.

## **QODOBKA 49'AAD**

## **HAYSASHADA LACAGTA BEEN ABUURKA AH:**

1. Qof kasta oo isagoo aan haysan cudur daar sharci ah caddayntiisuna isaga ku xidhan tahay.
   B) Iibsada, qaata, ama isku daya inuu wax ku iibsado ama qaato.

   T) Haya ama haysta

   J) Soo geliya Somaliland lacag been abuur ah wuxu ku jiraa dambi, wuxuna u qoolan yahay xabsi marka ay maxkamadu ku shaqada lihi amarto.
2. Qof kasta oo aan haysan cudur daar sharci ah, cadaynta isaga ku xidhan tahay ee haya ama haysta
   B) Xabuub ama cutubyo dahab ama qalin ah

T) Waslado dahab ama qalin ah

J) Dahab ama qalin habaas la galiyey, Milan ah ama si kale oo laga helay iyadoo la nasakhay ama la qafiifiyey qadaadiic dahab ama qalin ah oo runah wuxuu ku jiraa danbi wuxuuna u qoolan yahay xabsi marka ay amarto maxkamada ku shaqada lihi.

**QODOBKA 50'AAD**

**SHUBIDA LACAGTA BIR AH**

1. Qofna isagoo aan ruqsad ka haysan Baanka Dhexe ee Somaliland waa inaanu shubin jajabin ama si kale isticmaalin lacag bir (Qadaadiic) ah oo run ah si looga dhigo lacag qadaadiic ah oo run ah.
2. Qof kasta oo ku xadgudba farqada 1aad ama shuruud ku xidhan ruqsada lagu sheegay farqada 1aad wuxuu u qoolan yahay markay ku cadaato ganaax aan ka badnayn 25,000,000 (shan iyo labaatan malyuun) shilinka Somaliland ama xabsi aan ka badnayn laba iyo toban bilood ama labadaba, waxa kale oo u dheeraan kara in maxkamadu amarto in lala wareego waxyaabaha dembiga lagu galay.

**QODOBKA 51AAD**

**WAX-KA BEDEL**

1. Qofkasta oo isagoo aan haysan cudur daar sharci ah, caddayntuna isaga u taal,

B) wax ka bedela ama ogolaada inuu wax ka bedelo lacag been abuur ah ama lacag been abuur ah u isticmaala sidii lacag run ah.

T) Dibada uga saara Somaliland lacag been abuur ah waa dembiile wuxuuna u qoolan yahay xabsi dheer marka ay go'aamiso maxkamada ku shaqada leh.

2. Qof kasta oo isagoo khiyaamo u jeeda ogaan wax uga bedela
   b) Lacag qadaadiic ah oo aan run ahayn
   t) Waslad macdan ah ama macdano isku jira kuwaaso shabaha xagga xajmiga, muuqaalka ama midabka lacag qadaadiic ah oo runa oo sideeda looga bedelay, waa dembiile wuxuuna u qoolan yahay xabsi aan ka badnayn laba sanno marka ay amarto maxkamada ku shaqada leh.

## QODOBKA 52'AAD

## SLUGS AND TOKENS

1) Qofkasta oo sameeya, soo saara ama isticmaala amaba haysta waxkasta oo ujeedo khiyaamo loogu bedelan karo qadaadiic ama wax qiimo leh oo aallada been abuurka sheegtaa ay aqbalayso, waa dembiile Waxaanu u qoolan yahay khasiraad aan ka badneyn 25,000,000 SLSH ama xabsi aan ka badnayn lix bilood ama

labadaba marka ay go'aamiso maxkamada ku habbooni.

**QODOBKA 53'AAD**

**MUQAALTIRKA IYO DHAWAACIDDA**

**1.** Qofkasta oo**:**

B) Dhaawaca, yareeya ama fududeeya qidcad dahab ama qalin ujeedadusuna ay tahay inuu u gudbiyo qidcad dahab ama qalin ah oo run ah.

T) Isagoo ogsoon dhammaystir qidcada aynu ku xusnay farqada 1aad xarafka (B) waa dembiile wuxuuna u qoolan yahay xabsi marka ay amarto maxkamada ku shaqada lihi.

2. Qof kasta oo muuqaal ka tira lacag bira oo ah sax, ama dhammaystira lacag biro ah muqaalkeeda hore loo kharibay, iyadoo aanu Baanka Somailand fasixin muqaalka kaga badela lacag waraaq daabacaad shaambadeyn ama si kale ugu rAADeeyo kalmado xuruuf tiro ama dhammeystira lacag waraaq ah oo sax ah oo hore loo muuqaal tiray waa dembiile, wuxuuna u qoolan yahay ganaax aan ka badneyn 25,000,000 SL.SH ama xabsi aan ka badnayn lix bilood ama labadaba marka ay amarto maxkamada ku shaqada lihi.

## QODOBKA 54'AAD

## U-EKAANSHAHA LACAGTA WARAAQDA AH

1. Qofna waa in aanu samayn, faafin,daabicin, fulin,qaybin ama wareejin, isagoo ku isticmaalaya qaab koronto ama kambayuuter ku shaqaynaya waxkastoo u eg:
   - B) Lacagta waraaqda ee socota, ama
   - T) Damaanad deymeed ama damaanad dawladeed ama hay'ad kale oo maaliyadeed
2. Farqada 1aad ma khuseeyo:
   - B) Baanka Dhexe ee Somaliland ama shaqaalihiisaa marka ay shaqadooda fushanayaan.
   - T) Boolisku marka ay shaqadooda fushanayaan; ama
   - j) Qof uun heshiis ku shaqaynaya ama ruqsad uu ka haysto Baanka Dhexe ee Somalilandama booliska
3. Qofka ku xadgudba farqada 1aad wuxuu ku jiraa denbi wuxuuna u qoolan yahay ganaax aan ka badnayn 25,000,000 SLSh ama xabsi mudadiisu aanay ka badnayn lix bilood ama labadaba marka ay amarto maxkamada ku shaqada lihi.
4. Qofna waa in aan lagu soo oogin xad-gudub marka la eego farqada 3aad ee la xidhiidha daabicida wax u eg lacagta waraaqda ee uu soo saaray Baanka Dhexe ee Somaliland haddii la xaqiijiyo in dhererka iyo balaadhka waxa lacagta loo ekaysiiyey uu ka yar yahay afar

GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL

meelood saddex meel ama ka weyn marka lagu dhufto hal iyo badh dherer iyo balaadhka lacagta waraaqda ah ee loo ekaysiiyey Iyo In ekaanshu yahay cadaan iyo madow keliya ama U ekaysiinta lacagta waraaqdu wuxuu ka muuqdaa dhinac keliya lacag u ekaha.

**QODOBKA 55'AAD**

**AALADAHA AMA ALAABTA**

1. Qof kasta oo isagoo aan cudur daar sharci haysan, cadayntuna isaga ku xidhan tahay,

   b) Sameeya ama dayactira

   t) Bilaaba ama u socda inuu sameeyo ama dayactiro

   j) Iibsada ama iibiya, ama

   x) Gacantiisa ay ku jirto makiinad, injiin, qalab, aalad, alaab ama wax uu og yahay in loo isticmaalay ama og yahay in loola jeedo in loo isticmaalo sameynta ama been abuurka wax qiime lacageed leh wuxuu ku jiraa dembi xadgudub ah wuxuuna u qoolan yahay xabsi marka ay amarto maxkamada ku shaqada lihi.

**QODOBKA 56'AAD**

**GUDBINTA QALABKA LAGU SAMEEYO LACAGTA QADAADIICDA AH**

**(CONVEYING INSTRUMENTS FOR COINING OUT OF MINT)**

1. Qofkasta oo isagoon haysan cudur daar sharci ah - cadayntuna isaga ku xidhan tahay- Isagoo

ogsoon gudbiya qalabka lagu sameeyo lacagta birta ah (qadaadiicda) oo ruqsad loo haysto ama loo ogolaaday inuu lacagta qadaadiicda kusoo saaro gudaha Somaliland:

b) Makiinad, matoor, qalab, aalad, alaab ama wax loo isticmaalo in lagu soo saaro lacagta qadAADiicda ah,

t) Qayb muhiim ah oo ka mid ah wax kasta oo aynu ku sheegnay farqada1AAD xarafka (b) ama

j) Qadaadiic, waslad ama gobol, macdan ama macdano isku jira wuxuu ku jiraa xadgudub wuxuuna u qoolan yahay xabsi muddo dheer marka ay amarto maxkamada ku shaqada lihi.

## QODOBKA 57'AAD

## XAYEYSIINTA IYO GUDBINTA

1. Qofkasta oo isagoo:

   **b)** Qaab xayeysiin ah ama qoraal ah bixiya fursad lagu iibiyo ama la isugu gudbiyo lacag been abuur ah ama wax qiimo leh oo la abuuray ama bixiya xog lagu iibinayo been abuur lacag ama wax qiimo leh

   **t)** Iibsada, haysta, ku gorgortama ama si kale uga qaybqaata been abuurka wax yaabo qiimo leh ama isku daya inuu ku gorgortamo ama helo waxyaabahaas, wuxuu gelayaa denbi iyadoo ay ku xidhan tahay duruufaha xaaladas. Waxaanu mudan karaa xadhig aan ka badnayn Shan sanno markay go'aamiso maxkamadda awooda u lehi.

2. Qofna kuma mudan karo denbiga ku xusan farqada 1aad ee haysashada qadAADiic ama lacag warqad aan wax qiimo ah lahayn, haddiise uu ogyahay inaanay lacag ahayn oo wax qiimo ah u lahayn, balse ujeedo khiyaamo u haysto wuu ku mudan karaa.

**QODOBKA 58AAD**

**QODOBO GAAR AH OO WAX LAGU CADDEYNAYO**

1. Denbi kasta oo la xidhiidha been abuurka lacag ama wax qiimo leh, waxyaabo been abuur ah oo aan dhamaystiranayn ama aan ahayn nuqul sax wayaabaha la doonayo inay shabahdo waa lagu mutaysanayaa xataa yaanay dhammeystirnaaniba waxa loo qaadanayaa inay dhammaystiran tahay.
2. Waxa loo tixgelinayaa inay tahay Sax, cadayn uu saxiixay qof uu Baanka Soomliland u xilsaaray inuu hubiyo been abuurka lacagaha ama waxyaabaha qiimaha leh taasoo xusaysa lacagta ama waxyaabaha qiimaha leh ee ku xusan cadayntaasi ay tahay wax sax ah ama wax been abuur markhaati u noqonaya xitaa haddii aanay ku astaysnayn saxeexa ama astaanta qofka saxeexay caddeynta.
3. Qofkii ay lidi ku tahay caddeynta ku xusan farqada 2AAD iyadoo loo cuskanayo fasaxa maxkamadda wuxuu codsan karaa joogitaanka hubiyaha Baanka si uu hubin labaad ugu sameeyo.
4. Waa in cadeynta ku xusan farqada 2aad aan loo dhigin in wax lagu kala saaro (evidence)

dacwada ka hor iyadoo qofka caddeynta soo bandhigayaa aanu ogaysiin dhinaca kale ama siin nuqulka cadayntaas.

**QODOBKA 59'AAD**
**SOO SAARISTA SHARCI-DARADA AH EE LACAGTA WARAAQAHA AH, QADAADIICDA, AALLADAHA, WAXYAABAHA QIIME LACAGEED LEH.**

1) Qof kasta oo soo saaro lacag warqad ah ama qadaadiic ah isagoo ka horimanaya qodobka 33aad farqadiisa 1aad, ama wax kale oo qiimo leh oo loogu talagalay in lagu socodsiiyo waddanka gudihiisa wuxuu ku gelayaa danbi wuxuuna ku mutaysan karaa xadhig muddo dheer iyaddoo go'aanka ay leedahay maxkamadda awooda u lihi.

**QODOKA 60'AAD**

**LA WAREEGID (FORFEITURE)**

1. Dawladda Soomaliland waxay la wareegaysaa been abuurka lacag ama waxyaabo qiime leh ama agabka lagu sameeyo waxyaabaha been abuurka.
2. Sarkaal **police** wuxuu xayiri karaa ama xanibi karaa:
   b) Lacag been abuur ah.
   t) Been abuur waxyaabo qiime leh
   j) Makiinado ama agab kale oo loo isticmaalay ama la doonayo in loo isticmaalo in lagu soo

saaro been abuurka lacag ama waxyaabo qiime leh.

3. Wax-kasta oo lugula wareegay sifaha ku xusan farqada 1aad ee qodobkan Waxaa loo dirayaa Baanka Dhexe ee Somaliland si uu u baabiiyo ama uga qaato dariiqa ku habboon. Laakiin been abuurkasta oo looga baahan yahay inuu markhaati noqdo loo diri maayo Baanka.

4. Lacag waraaq ah, qadaadiic ama waxyaabo kale oo qiimo leh oo aan ahayn kuwa lagu sheegay farqada 1aad oo loogu talagalay in lacag ahaan loo isticmaalo Waxaa loo qaadanayaa been abuur lacag ama waxyaabo qiimo leh marka laga reebo waxyaabaha lagu ogolaaday cutubkan.

## CUTUBKA 6'AAD

## HAWLAHA IYO SHAQADA ARRIMAHA LACAGTA

## (MONETARY FUNCTIONS AND OPERATIONS)

### QODOBKA 61'AAD

### SIYAASADDA LACAGTA

1) Baanka Soomliland wuxuu masuul ka yahay samaynta, isticmaalka, iyo hirgelinta habdhaqanka siyaasadda lacagta ee Somaliland.

## QODOBKA 62'AAD

## KA HAWL GELIDDA SAYLADAHA FURAN

1) Iyadoo la raacayo ku dhaqanka siyaasada lacagta Baanka Dhexe ee Somaliland, wuxuu Baanku ka hawl geli karaa sayladaha furan isagoo iibsanaya ama iibinaya xaalad markaa taagan ama mustaqbalka ama heshiis dib u iibsi lacago qalAAD ama heshiisyo dayn. Lacago kale ama heshiisyo saami looma isticmaali karo ujeedadan.

## QODOBKA 63AAD

## DHIGAALKA LACAGEED EE BAANANKA LOOGA BAAHANYAHAY

1. Isagoo ku dhaqmaya siyaasadiisa lacagta, Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu ka dalban karaa Baananka inay kayd ku yeeshaan Baanka Soomaliland, iyadoo loo eegayo heerka kayd ee Baan kasta looga baahan yahay. Heerka kaydka ee baan Waxaa xadidaya, xaddiga, nooca ama cimriga (Maturity) lacagta uu soo amaahan karo iyo lacagta uu amaahda u bixin karo waxay waafaqsanaan doonaan shuruucda Baanka Dhexe ee Somaliland u dejiyo Baananka gaarka ah. Kaydka looga baahan yahay marka amaahda qaadanayaan Baananku way u siman yihiin.
2. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu marar kala gedisan sharci ku xadidi karaa kaydka looga baahan yahay inay Baananku ku yeeshaan Baanka Dhexe ee Somaliland qaab

lacag caddaan ah ama kayd ahaan, taas oo ku salaysnaan doonta kaydka celceliska ee maalinlaha ah ee Baankaasi lahaa.

3. Sharciga ku xusan Faqrada 2[AAD], ee ah in Baananka kayd looga baahan yahay ama heerka lacageed ee kaydka lagu dejinayo ama wax lagaga bedelayo, waa in lagu xusaa kaydka cusub ama heerka lacageed ee kaydka iyo taariikhda uu dhaqan gelayo.
4. Kaydka Baanka Dhexe ee Somaliland ka qaadayo Baananka Ganacsiga waa in lagu kaydiya Baanka Dhexe ee Somaliland ama Baanan Dibadeed oo laysla ogyahay
5. Lacagaha dhigaalka ah ee Baanka Dhexe kayd ahaan uga haynayo Bananka Islaamiga ah waa inay noqdaan xisabaha socda iyo xisaabta kaydsan oo kaliya.
6. Baanka Islaamiga ahi waxa kayd ah laga qaadimaayo marka la eego dhigaaladooda maal galineed ee loo dhiibtay si ay mashaariic ugu maal galiyaan.
7. Baanka Dhexe waxa u bannaan inuu hantida maalgashiga ee baananka Islaamiga ahi hayaan uu hubiyo hanaanka maamul iyo mashaariicda lagu maal galinayo si uu dumaanad qaado hufnaanta adeegyada Baanka iyo dhawrsanaanta hantida maal gashadaha
8. Madaama Baananka Islaamiga ahi aanay wax dulsaar ah ka qaadanayn lacagaha kaydka ee Baanka Dhexe ka hayo, waa in Baanka Dhexe ku maalgaliyaa hanaan Islaamiya oo ay maamulayso Guddi loo dhanyahay wixii faa’iido

ahna loo qaybsadaa si boqolay ah oo lagu heshiiyey.

## QODOBKA 64'AAD

## KA BAAQSASHADA JOOGTAYNTA DHIGAALKA LOO BAAHAN YAHAY

1) Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu kusoo rogi karaa khidmad islamarkaana ka qaadi karaa ganaax Baanka ka baaqsada inuu joogteeyo heerka ugu hooseeya ee kaydka looga baahan yahay sida waafaqsan qodobk 63aad khidmadaas waxay ku salysnaan doontaa shuruucda Baanka Soomaliland.

## QODOBKA 65'AAD

## HAWLAHA QIIME DHIMISTA

1. Baanka dhexe ee Soomaliland wuxuu qiime dhimis ku samayn karaa agabyo maaliyadeed (financial instruments) marka uu Baan Macaamil la leeyahay Baanka Soomaliland:

   B) Bills of exchange and promissory notes, kuna qiimeysan shillinka Soomaliland laguna bixinaya gudaha Soomaliland, kuwaas oo xambaarsan saxiixa saddex xubnood oo gudi kara qiimaha lacageed ee agabka, xubnahaas oo mid ka mid ihi yahay Baan, agabkaas waqtiga u hadhsani waa in aanay ka badnayn muddo saddex bilood oo ka bilaabma marka ay gaadho Baanka Soomaliland.

T) Haddii duruufo gaar ahi lasoo darsaan Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu qiimo dhimis u samayn karaa agab maaliyadeed oo

xambaarsan saxiix laba xubnood oo midkood Baan yahay oo guddi kara qiime lacageed ee agabka ay mudada u hadhsani ka badan tahay saddex bilood kana yar tahay lix bilood taariikhda ay soo gasho Baanka Soomaliland.

J)Agabka deyn ee ay soo saaraan ama damiintaan Dawladda ama Baanka Dhexe ee Somaliland oo laguna kala qaadanayo Soomaliland gudaheeda kuna qiimeysan shillinka Soomaliland, agabkaasi waa in uu ka mid ahaa deynsheeg dawladu soo saartay oo mudada u hadhsani ay ku kooban tahay saddex bilood laga soo bilaabo marka ay soo gaadho Baanka Soomaaliland.

2. Hawlaha qiime dhimista ee ku xusan farqada 1aad ee qodobkan, heerka qiime dhimista iyo wixii shuruuc ah ee la xidhiidha waxa soo saaraya Baanka Soomaliland.
3. Baanka Dhexe ee Somaliland wuu ku diidi karaa inuu qiime dhimis ku sameeyo agabkaas hore loo sheegay.

## QODOBKA 66'AAD
## AMAAHDA LA SIINAYO BAANANKA

1. Baanka Dhexe ee Somaliland isagoo cuskanaya shuruudaha la xidhiidha wuxuu amah siin karaa Baan xisaabi uga furan tahay Baanka Dhexe ee Somaliland muddo aan ka badneyn saddex bilood, amaahda waa in lagu sugaa (secured) jiritaanka noocyada hantiyeed ee soo socda:

B) Kayd hantiyeed oo caalami ah sida ku xusan qodobka 71aad ee xeerkan.

T) Balanqaad deymeed oo uu soo saaray ama damaanad siiyey, laguna kala qaadan karo Soomaliland gudaha Soomaliland kuna qiimeysan shillinka Soomaliland qaybna ka ah iib deynsheeg dawladu soo saartay.

J) Rasiidho Bakhaar ama qoraalo xambaarsan magaca bakhaarka ayna ku xusan yihiin badeecado loo baahan yahay kana caynsan lumitaan iyo waxyeelo.

X) Kayd yaala Baanka Dhexe ee Somaliland ama kaydad kale uuna aqbali karo Baanka Dhexe ee Somaliland ama hanti kale oo loo ogol yahay Baanka Soomliland iibsado ama iibiyo ama heshiis ku galo si waafaqsan xeerkan, Waxaa ku jiri kara hantidaa dahab, macdanaha iyo dhagxaanta qiimaha leh.

2. Amaahda Baanka Dhexe ee Somaliland ku siinayo deynqaatayaasha xisaabaha ku leh wuxuu ka dhici karaa xarumaha Baanankaasi ku leeyihiin Soomaliland.

## QODOBKA 67'AAD

## HEERKA QIIME DHIMISTA IYO XADIGA AMAAHDA

1) Heerka qiime dhimista ama xadiga amaaahda uu bixinayo Baanka Dhexe ee Somaliland waxa xadidaya shuruucda iyo xeernidaamiyaha Baanka Soomaliland loo dejiyey.

## CUTUBKA 7AAD
## SIYAASDDA SARIFKA, XADIDAADA SARIFKA LACAGAHA QALAAD
## QODOBKA 68'AAD

## SIYAASADDA GUUD

1. Baanka Dhexe ee Somaliland waxa uu keligii mas'uul ka yahay dejinta iyo hirgelinta siyaasadda Sarifka Soomaliland, inta aanu talabadaa qaadin, waa in uu Baanku la tashadaa Wasaaradda maaliyadda.
2. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu wakiil Soomliland uga noqdaa sida loo raacayo shuruucda dhaqan gashay ee xadidAADa sarifka. Wixii xisaab celin ah ama xog ah ee arrintaa ku saabsan waa inuu Baanku soo bandhigaa.

## QODOBKA 69'AAD

## MAS'UULIYADAHA BAANKA SOOMALILAND

Si khaas ah Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu mas'uul uga yahay:

B) Soo saarida Shuruucda iyo amarada looga baahan yahay hirgelinta Siyaasadda sarifka iyo socodsiinta hawlaha sarifka qalaad ee gudaha dhulka Soomaliland.

T) Diiwaangelinta, bixinta ruqsadaha, sida lagu maamulayo iyo kormeerka sariflayaaasha lacgaha qalaad oo ay ku jiraan Baananka iyo hay'adaha maaliyadeed ee kale iyadoo la raacayo qodobka 74aad.

J) Dejinta xadiddaada xaddiga lacagaha qalaad ee sariflayaasha iyo Baananka.

X) Qabashada iyo habaynta xaraashka lacagaha qalaad.

KH) Qabyotirka(maintaining) iyo maamulka dhigaalka lacageed ee debadda u yaala Soomaliland.

**QODOBKA 70'AAD**

**HESHIISYADA ADEEGA HAWL-FUDUDEYNTA IYO LACAG-BIXINTA CAALAMIGA AH**

**(INTERNATIONAL CLEARING AND PAYMENTS AGREEMENTS)**

1. Baanka Dhexe ee Somalilandwuxuu iskiisa ama isagoo ka wakiila dawladda la geli karaa heshiis hawl fududeyn ama lacag-bixineed ama heshiis kasta oo kale oo isla ujeedadaas ah, dadweyanaha ama hay'adaha hawlfududeyneed ee gaarka loo leeyahay ee debedda deggan.

**QODOBKA 71'AAD**

**HANTIDA DHIGAALKA CAALAMIGA AH**

1. Baanka Dhexe ee Somalilandwaa inuu qaabeeyaa, qabyo-tiraana dhigaalka caalamiga ee Soomaliland, oo ka kooban dhammaantood ama qaar ka mid ah hantida soo socota:
   b. Dahab, macdano qiimo leh iyo dhagxaan qiimo leh.
   t. Lacag waraaqo ama qadaadiic ah oo loo rogi karo lacag qalaad.

j. Hadhaa dheeraad ah oo si xor ah loogu rogi karo lacag qalaad kuna jira xisaabaha Baanka Dhexe ee Somalilandku leeyahay Baanan dhexe oo qalaad ama hay'ado kale oo maaliyadeed.

x. Wadarta guud ee hantida kaydka caalamiga ah ee hay'ada lacagta dunida ee dawladdu hayso.

Kh. Heshiis lacag kala qaadasho oo mudeysan, deyn sheegtooyin, shahaadooyinka dhitada, ballanqaad deymeed, ama damaanado deymeed oo kale oo lagu bedeli karo lacag qalaad oo ku jirta xisaabaha Baanka S/land.

d. Heshiis alaab mustaqbalka lagu kala iibsanayo ama heshiis dib-u-iibsi, ama heshiis lacag isdhaafsi uu Baanka Dhexe ee Somalilandla galay Baanan dhexe ama Hay'ado maaliyadeed oo caalami ah ama heshiisyo kale oo Baanka Soomaliand xaq u siinaya in wax lagu siiyo, taas oo loo rogi karo lacag qalaad

r. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu ku hayaa dhigaalka caalamiga heer ku filan fulinta siyaasadaha lacagta, heerarka sarifka iyo bixinta degdega ah ee dhaqdhaqaayada caalamiga ah ee wadanka.

s. Haddii dhigaalka caalamiga ah ee ku xusan farqada 2aad ee qodobkan uu

hoos u dhaco ama uu khatar ugu jiro hoos u dhac uu ku xanibi karo fulinta siyaasadaha Soomaliland ee lacagta, heerarka sarifka iyo bixinta degdega ah ee dhaqdhaqaaqyada caalamiga ah ee wadanka, Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu bilaabaa talaabooyin sixitaan ah, una gudbiyaa golaha wasiirada Soomaliland warbixin ku saabsan xaaladda, raaciyana talooyin hadba sida uu arko in xaaladda lagu daweyn karo.

Sh. inta xaalada ku xusan farqada 3aad laga saxayo, Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu wadaa hawsha sixitaanka uuna sameeyaa warbixinada iyo talooyinka hadba siday lagama maarmaan u tahay.

## QODOBKA 72'AAD
## YEELASHADA, HAYNTA IYO ISKA SAARIDA DHIGAALKA CAALAMIGA AH

1) Baanka dhexe Soomaliland waa inuu si waafaqsan xeerka Baanka u yeesho awood uu ku qaado hawlaha lagama maarmaan u ah inuu yeesho, hayo, iyo inuu iska saaro hantida dhigaalka ee caalamiga ah ee lagu cayimay qodobka 71aad, farqada 1aad iyo inuu ku maamulo qaababka ugu fiican ee caalamka laga aqoonsan yahay.

## QODOBKA 73'AAD

## XADAYNTA DEYMAHA LACAGAHA QALAD

## (LIMIT ON FOREIGN EXCHANGE LIABILITIES).

1) Baanka dhexe ee Soomaliand waa in aanu oggolaan inuu kordho deymaha (liabilities) lagu bixinayo lacagaha qalad, si aanu uga badan deymahaasi boqolkiiba konton dhigaalka (reserve) Baanka Dhexe ee Somalilandu yaal.

## QODOBKA 74'AAD

## SARIFLAYAASHA LACAGAHA QALAAD

## (FOREIGN EXCHANGE DEALERS)

1. Sarifle kasta waa inuu ruqsad uga helaa Baanka Dhexe ee Somaliland hawlaha sarifka lacagaha qalaad.
2. hay'ada soo socda waa ka reeban yihiin sida ku xusan Farqada koowaad ee qodobkan:
   - B. Baanka dhexe ee Soomaliland
   - T. Baananka
3. Sarifleyaasha lacagaha qalaad waa inay aqbalaan shuruucda,qawaaniinta iyo hababka Baanka Soomaliland, gaar ahaan siyaabaha soo socda:
   - B. Ka warbixinta dhaqdhaqaaqa (transaction) qiimahiisu ka badan yahay xaddiga ugu yar ee ay goysay shuruucda Baanka dhexe ee Soomaliland.
   - T. Ururinta iyo qabyo-tirka (maintain) xogta ku saabsan macaamiishooda.

J. Bixinta xog ku saabsanmacaamiisha, maareynta iyo maamulka ganacsigooda iyo xaaladda maaliyadeed sida lagu cadeeyey sharciga Baanka Soomaliland.

4. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu kala noqon karaa ruqsadda ama diiwaangelinta sariflaha lacagaha qalaad haddii sarifluhu ka baaqsada inuu ku dhaqmo qodob ka mid ah xeerkan ama sharci uu soo saaray Baanka ee Somalilandoo raacsan xeerkan ama galo falal dembiyeed.

**QODOBKA 75'AAD**

**SHURUUDAHA RUQSAD SIINTA SARIFLAYAASHA**

1) shirkad kasta oo doonaysa inay ka ganacsadaan hawlaha sarifka lacagaha waa inuu codsi ogolaansho u soo gudbistaa Baanka dhexe ee Somaliland
2) codsiga waa inay ku qornaadaan mulkiilayaasha ,raasamaalka uu ku shaqaynayo iyo meesha uu ku yaalo
3) fiiga ruqsadsiinta sariflayaasha sanadka waa sidan:
   - b) Sarifka darajada 1aad **30,000,000**
   - T) Sarifka darajada 2aad **18,000,000**
   - J) Sarifka darajada 3aad **9000,000**
   - X) Sarifka darajada 4aad **1800,000**
4) Sariflayaasha darajadoodu waxay noqonayaan sidan:-
   - b) Sariflayaasha darajada 1aad waxa loo aqoonsanayaa 600,000,000 iyo wixii ka badan ku shaqeya

t) Sariflayaasha darajada 2aad waxa loo aqoonsanayaa 300,000,000 ilaa 600,000,000 ku shaqeeya

j) Sariflayaasha darajada 3aad waxa loo aqoonsanayaa 120,000,000 ilaa 300,000,000 ku shaqeeya

x) Sariflayaasha darajada 4aad waxa loo aqoonsanayaa 120,000,000 iyo wixii ka hooseeya kushaqeya

5) Baanka dhexe marka uu qiimayn ku sameeyo codsadayaasha kuna qanco waxa uu siinaya ogolaansho

6) sariflayaasha ka hawl gala gobolada waxa ruqsada siinaya laamaha Baanka ee xarumaha gobolada waxanay usoo gudbinyaan xarunta dhexe

7) Baanka Dhexe ee Somalilandwuxuu kala noqon karaa ruqsadda ama diiwaangelinta sariflaha lacagaha qalaad haddii sarifluhu ka baaqsada inuu ku dhaqmo qodob ka mid ah xeerkan ama sharci uu soo saaray Baanka Dhexe ee Somalilandoo raacsan xeerkan ama galo falal dembiyeed.

## Cutubka 8'AAD

## XIDHIIDHKA BAANKA DHEXE EE SOMALILAND IYO DAWLADD A

### QODOBKA 76'AAD

### BAANK, LA TALIYE IYO WAKIIL MAALIYADEED (FISCAL AGENT)

1. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu u dhaqmaa sida Baan, la taliye ama wakiil maaliyadeed oo dawladda ah. Hay'adaha

dawladda sida wasaaradda maaliydda waa inay go'aamisaa in aanu Baanka Dhexe ee Somaliland samayn Karin dhaqdhaqaaq (transaction) uu taageero maaliyadeed ku fidinayo si dan u ah dawladda ama hay'ad kasta oo dawladeed.

2. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu kala tashadaa wasaaradda maaliyadda, soo jeedin kasta oo la xidhiidha ujeedooyinka ama xilalkiisa ka hor inta aan loo gudbin Golaha Wakiilada.
3. Sannadkasta wasaaradda maaliyadu waa inay kala tashataa Baanka Dhexe ee Somaliland diyaarinta miisaaniyadda dawladda sannadka soo socda. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu u soo gudbiyaa wasaaradda maaliyadda warbixin qoraal ah oo ku saabsan xaaladda dhaqaale iyo maaliyadeed ee la xidhiidha miisaaniyadda la odorasayo.
4. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu u soo gudbiyaa wasaaradda maaliyadda soona daabacaa miisaaniyadiisa sannadka soo socda, si uu u muujiyo xaddiga lacageed ee uu u gudbinayo dawladda sannadkaa.

## QODOBKA 77'AAD
## WADATASHIYADA IYO KA WARBIXINTA DAYMAHA GUUD.

1. Sannadkasta wasiirka maaliyaddu waa inuu kala tashadaa Baanka Dhexe ee Somaliland qorshihiisa daymaha guud (public sector borrowing) ee gudaha iyo dibedda oo ay ku jirto

daymaha sida loo helayo, sida loo kaharash garaynayo iyo sida la filaayo inay ku xidhnaan doonaan bixintoodu. Dhaqdhaqaaq kasta oo deymeed oo dawladda ama laamaheedu sameeyaan waa in si faahfaahsan looga warbixiyaa sida shuruucda la xidhiidha arrimahaasi dhigeyso.

## QODOBKA 78'AAD
## DHIGAALKA IYO LACAG HAYAHA QARANKA (DEPOSITORY AND CASHIER FOR THE STATE)

(Goob dhigaal iyo lacag hayaha dawladda)

1. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu oggolaan karaa dhigaalka dawladda ama laamaheeda sida ay wasaaradda maaliyaddu go'aamiso. Dhigaal ahaan Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu lacagaha qabtaa, bixiyaa, ilaaliyaana xisaabaadka hawsha la xidhiidha, weliba waa in Baanku bixiyaa adeegyada kale ee la xidhiidha hawlahaas. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu dhigaal kasta wax kaga bixin karaa amarka cida dhigatay, xaddi aan dhaafsanayn inta dhigaalka ugu jirta.
2. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu fasaxi karaa in hay'do kale oo maaliyadeed ay qabtaan dhigaal si waafaqsan shuruudaha uu Baanka Dhexe ee Somaliland dhigo.

## QODOBKA 79'AAD
## SHAQADA WAKAALAD MAALIYAD AHAAN

1) Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu ku waafiqi karaa wasiirka maaliyadda inuu u dhaqmo sidii

wakiil maaliyadeed (fiscal agent) xisaabta dawladda ama laamaheeda marka la eego arrimaha soo socda:

B) Suuqgeynta ballanqaadyada deymaha (debt securitites) ay soo saaraan laamahaas dawladda ama diiwaangelin ama wareejin la xidhiidha ballanqaadyadaas.

t. Bixinta ballanqaadyadaas;

J) Fulinta dhaqdhaqaaqyada lacag bixineed ee xisaabaha ay laamahaasi ku leeyihiin Baanka Soomaliland.

X) Iyo arrimaha kale ee waafaqsan ujeedooyinka iyo waajibAADka Baanka Soomaliland.

## QODOBKA 80'AAD
## XOGTA LOO BAAHAN YAHAY
## (REQUIRED INFORMATION)

1) Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu ka helaa dawlada xogta maaliyadeed iyo dhaqaale iyo qoraalo hawshaa ku saabsan si uu Baanku hawlihiisa u guto.

## QODOBKA 81'AAD

## AMAAHDA UU BAANKA SOOMALILAND SIIYO DAWLADDA

1. Iyadoo ku xidhan ogolaanshaha Golaha Wakiilada wuxuu :

B) Horumarin u sameyn karaa dawladda iyo marka dawladdu bixiso damaanad hay'ad kastoo dawladeed.

T) Iibsiga, haysashada ama iibinta ballanqaadyada deymeed ee qiimahoodu

furan yahay (negotiable security) in kasta cimrigoodu ha leekaado, kuwaas oo ay soo saartay dawladdu ama hay'ad dawladeed oo dawladdu dammiinatay.

2. Marka golaha wakiiladu ogolAADaan wadarta cadadka amaahda Baanku ku bixinayo iyadoo la eegayo sida qodobkani ogol yahay iyo cadadka amaahda xili uun taagani waa inaanay ka badnaan toddoba meeloodow meel wadarta amaahda lagu leeyahay dawladda.
3. Marka ay golaha wakiiladu ogolaadaan Baanku wuxuu si aan rasmi ahayn u sii horumarin karaa dawladda lacag ay ka filayso dibedda, cadadka horumarintaas waa in aanay ka badan boqolkiiba konton xadiga ay amaahda dawladdu ka filayso dibedda, iyadoo ballanqaadyo rasmi ka jiraan xagga dawladda. Horumaintaas waa in isla marka ay dawladdu hesho lacagta ay dibedda ka filayso ay dib u bixiso horumarinta.
4. Marka laga reebo sida ku xusan farqadaha 1aad, 2aad iyo 3aad ee qodobkan, Baanku waa in aanu amaah u fidin dawladda ama laamaheeda, si toos ah ama si dadban.

## QODOBKA 82'AAD
## IIBSIGA BAANKA DHEXE EE SOMALILAND BALLANQAADYADA DEYNTA EE DAWLADDA.

(Purchases of government securities by the Bank of Somaliland)

1) Baanka dhexe ee Somaliland Waxaa ka reebban inuu iibsado ballanqaadyada deynta ee ay

dawladdu soo saarto, marka laga reebo iib waafaqsan ujeedooyinka siyaasadiisa lacagta ama Baanku u baahan yahay inuu iibkaas lagu maalgelinayo hantida Baanka Soomaliland.

## CUTUBKA 9'AAD
## XIDHIIDHKA BAANKA DHEXE EE SOMALILAND IYO BAANANKA

### QODOBKA 83'AAD
### RUQSADSIINTA, MAMULIDA IYO KORJOOGIDDA

1) Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuuu mas'uul ka noqdaa ruqsad siinta, diiwaangelinta iyo hagidda Baanyada ka shaqaynaya Soomaliland.

### QODOBKA 84'AAD
### ISKAASHIGA LALA YEELANAYO KORJOOGEYAASHA (SUPERVISORS) BAANANKA QALAAD.

1. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu iskaashi dhow la yeeshaa hay'ad kasta oo ku shaqo leh inay hagto Baananka qalaad si iswaydaarsi oo khusaynaysa shuruucda Soomaliland iyo shuruucda waddanka Baanka qalaad kaasoo jeedo' Iskaashigaas waxa rasmi lagaga dhigi karaa heshiis dhexmara Baanka Dhexe ee Somaliland iyo maamulka haga Baanka qalaad (supervisory authority).
2. Iskaashigaas waxa ku jiri kara xog ku saabsan sida Baanku uga shaqeeyo laba meelood oo sharciyo kala duwan leh, haddii la raaco

mabd'a isku kalsoonaansha (confidenciality) labada dhinac.

## QODOBKA 85'AAD

## XISAABAHA BAANKA KA FURAN

## (BANK ACCOUNTS ON THE BOOKS)

1) Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu awood u leeyahay inuu xisaabo furo, u hayo xisaabo Baananka, sariflayaasha lacagta qalAAD, qolyaha bixiya adeegyada ballanqaadyada iyo hawlwadeenada hababka lacag bixinta iyo cidkasta oo sharcigu us oo gudbiyo si waafaqsan shuruudaha u yaalla heshiisyada xisaabta ama sharciga Baanka.

## QODOBKA 86'AAD

## AMAAH BIXIYAHA U DANBEEYA

## (LENDER OF THE LAST RESORT)

1) Baanka Dhexe ee Somaliland isagoo ku socda qodobo iyo shuruudo wuxuu u dhaqmi karaa amaah bixiyaha u danbeeya ee amaah siinaya hay'adaha maaliyadeed ee gudaha iyo debedaba ee xisaabta Baanka ku leh muddo aan ka badneyn saddex bilood. Tageerada maaliyadeed ee noqon karta qaab amaah, wax is dhaafsi, dib usoo iibsasho ama heshiis mustaqbalka ku xidhan (contingent commitments) waxa hubaal ka dhigaya hantida lagu xusay qodobka 66aad, haddii aanu baanku go'aansan inuu ballanqaad aan la

hubin ku sababeeyo xaalado gooni ah, Ballanqaad noocaas ah waa in aanu Baanku gelin, illaa:

B) Marka la eego, fikrada ballanqaadkaasi iftiimiyo dhaqaalaha macmiilka iyo ta danta guud.

T) Wasiirka maaliyadu waa inuu wafaqaa ballanqaadkaa 24 sacadood gudahood marka Baanka Dhexe ee Somaliland wasiirka usoo gudbiyo. Baanku wuxuu kordhin mudada iyadoo la eegayo shuruud ah inuu macmiilku qaado tallaabooyin uu ku qancinayo Baanka inuu sidii uu baanku rabay wax u wado.

## **CUTUBKA 10'AAD**

## **LACAG BIXINTA, HAWLFUDUDEYNTA IYO DEYNBIXINTA**
## **(PAYMENT, CLEARING AND SETTLEMENT)**

### **Qodobka 87'AAD**

### **HABABKA LACAG BIXINTA IYO HAWLWADEENADA HABABKA LACAG BIXINTA.**

1. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu dejinayaa, qabyo tirayaa (maintain) korna u qaadayaa habab lacag bixineed oo toosan oo hufan.
2. Baanka Dhexe ee Soomalland wuxuu mas'uul ka noqayaa diiwaangelinta, ruqsadsiinta iyo hagidda hababka iyo hawlwadeenada hababka lacag bixinta.

3. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu kormeeri karaa hababka lacag bixinta si waafaqsan sharciga:-

   B) U dalban karaa diiwaangelinta ama ruqsadsada hab kasta oo lacagbixineed ama hawlwadeenada lacag bixinta.
   T) U gudbin karaa habkasta oo lacagbixineed iyo hawlwadeenada lacag bixinta shuruudo (prudential requirements) oo ay ku jirto shuruudaha Baanka Dhexe ee Somaliland ee uu ugu talagalay meelmarinta hagidda hababka lacag bixinta iyo hawlwadeenada lacag bixinta iyo inuu ilaaliyo badbaadinta hantida guud ee lagu aaminay.
   J) Inuu dejiyo shuruudo ay ku jirto shardiga u qalmida (eligibility requirement) taas oo hay'adaha maaliyadda iyo adeeg-bixiyeyaasha lacagtu kaga qaybqaadan karaan habkasta oo lacag bixineed.
   X) Inuu u gudbiyo hababka lacagbixineed ama hawlwadeenada hababka lacag bixinta qodobada raacsan cutubkan 9AAD.

4. Shuruudaha ku jira qodobkan oo ay ka mid yihiin ruqsadsiinta iyo diiwaangelinta waxay ku kala duwanaan karaan hababka lacag bixinta ama hawlwadeenada lacag bixinta.

5. Baanka dhexe ee Soomailland waxa uu awood u leeyahay inuu qabto hawlahaas aynu soo sheegnay hadba sida uu arko inay lagama maarmman u tahay waajibaadkaa lagu sheegay farqada koowaad kuna jirto iyadoo aan xadidnayn:

B) Kor u qaadida (promoting), isku dubaridka iyo ka qaybqaadashada hababka lacag bixinta.

T) Qabyotirka (maintaining) ee hay'adaha maaliyadda iyo hawlwadeenada hababka lacag bixinta iyadoo la raacayo shuruudaha ku xusnaan Kara sharciga arrintaa khuseeya ama heshiis.

J) Iyadoo uu u fududaynayo macaamiisha xisaabta ku leh in ka badan dhigaalka u yaala, (facilities for overdraft) taas oo baanku ku hubinayo dammanad hanti ma guurto ah si waafaqsan shuurudaha ay dhigayaan shuruucda arrintaa la xidhiidha.

X) Dejinta, socodsiinta iyo ka qaybqaadashada isku xidhka dhinaca xogta ah oo uu yeesho hab maaliyadeedka Somaliland.

6. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu qabanqaabin karaa ama fududayn karaa.

B) Isku xidhka habkiisa lacag bixineed iyo hababka kale ee lacag bixinta

T) Abuurida qaabab cusub iyo teknoolajiyad habka lacag bixinta ee lacagta waddanka iyo lacagaha qalaad.

J) Qaabeynta iyo wax ka bedelid xiliyeysan qorshaha socda ee isbdelka hababka lacag bixinta ee qaranka Soomaliland.

**QODOBKA 88'AAD**

**SIYAASADDA HABKA LACAG BIXINTA**

1. Baanka Dhexe ee Somaliland waxa uu qaabaynayaa, hirgelinayaa, faafinayaa, dabagalayaa dushana kala soconayaa fulinta siyaasadda lacag bixinta.
   **B)** Siyaasaddu waa inay ku jiheysnaataa u faa'iideynta bulshoweynta Soomaliland iyadoo ku qotonta qaababka lacag bixinta ee caalamiga ah ee ugu wanaagsan iyo inuu suurtogeliyo degenaanshaha habka maaliyadeed.
   **T)** Waa inuu kor u qaadaa badbAADada lacag bixinta iyo inuu yareeyo khataraha ku iman kara habka lacag bixinta.
   **J)** Siyaasaddu waa inay kobcisaa meelaha danta guud khuseysa oo weliba gaar ahaan wax ku biirisaa kor u qaadida tartanka saylada adeegyada lacag bixinta, iyo ilaalinta dadka isticmaala habka lacag bixinta.
2. Kor u qaadida badbaadada iyo hufnaanta habka lacag bixinta, Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu iskaashi la sameeyaa hawlwadeenada hababka lacag bixinta, baananka dhexe ee kale iyo hay'adaha la xidhiidha ee kale ee gudaha iyo debedaba.

## QODOBKA 89'AAD
## KHATARAHA GUDAHA IYO HUBINTA DEYNBIXINTA
## (INTERNAL RISKS OF THE SYSTEM AND SETTLEMENT CERTAINTY)

1. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu dhaqan gelin karaa shuruuc ama soo saari karaa tilmaamo lagu talagalay in lagu xakameeyo khatarta habeysan ama in la hubiyo degaanshaha hababka lacag bixinta.
2. Shuruucda iyo tilmaamaha la soo saaray ee raacsan qodobkan waxay bixin karaan: sharcinimadiisa, fulintiisa iyo inay yeeshaan saamaynta xidhiidh ka dhaxeeya dhinacyada dhexdooda ama gudahooda iyo dhinacyo saddexaad ee heshiisyada ka dhexeeya laba dhinac ama dhinacyo badan oo waajibAAD isweydaarsi ah qaynuunka heshiisyada,qaynuunada deynbixinta ee lagu maamulayo dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed ee u dhaxeeya hay'adaha maaliyadda iyo xisaab lagu sugay si waafaqsan heshiisyada iyo shuruucda ka hortagga ama yareynta khatarta ku lamaan ka baaqsiga in la dhamaystiro waajibAADka heshiisyada dhinacyada badan dabaqada iyo socodsiinta heshiisyada dhinacyada ama dhinacyo saddexAAD ee qodobada xeerka baananka ee dhamaystirka heshiisyada ee amar loo diro shaqsiyAAD aan bannaan ahayn iyo qodobada xeer Baanka ee lagu gelayo heshiis maaliyadeed oo u dhexeeya shaqsiyAAD aan Baanyo ahayn, iyadoo aan la eegayn qodob kasta oo sharci ku jira ma

ganaax ama xakamayn ka timAADa in la raaci waayo tuducyada a,b, & c, ee qodobkan.

## QODOBKA 90'AAD

## ADEEGA LACAGTA

1. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu mas'uul ka yahay diiwaangelinta, ruqsadsiinta sharci u sameynta iyo korjoogida (supervision) kuwa sameeya adeegyada lacagta.
2. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu korjoogi karaa adeeg bixiyeyaasha lacageed, wuxuu kaloo:-

   B) Dalban karaa ruqsadsadooda ama diiwangelintooda,

   T) u gudbin karaa adeeg bixiyayaasha qodobo ka mida shuruucda la xidhiidha qodobkan.

   J) Dejin karaa shuruudo ku saabsan sida adeegyada lacagta loo bixinayo iyo in korjoogenimada Baanka Dhexe ee Somaliland ee adeega lacagaha in la sameeyo iyo in la dhawro badbAADada hantida dadku ku aaminay adeega bixiyeyaasha

   X) Weydiisan karaa adeeg bixiyeyaasha lacagta inay uga warbixiyaan dhaqdhaqaaqyada xadigoodu ka badan yahay qadarka laysla xadiday waaxda ama hay'adda ku shaqada leh.

3. Shuruudaha qodobkani dhigayo ee ay ka mid yihiin ruqsadsiinta iyo dhiiwaangelintu waxay si kala duwan loogu dabiqi karaa qaybaha adeeg bixiyeyaasha lacagta.
4. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu sharci u dejin karaa, korjoogina karaa adeegyada ama fududaynta ay bixiyaan hay'adaha maaliyadda oo ay ku jiraan adeeg bixiyeyaasha lacagta marka ay dirayaan, habaynayaan ama qabanayaan awaamiir lacag bixineed ee macaamiishooda lacagaha Sh.SL iyo kuwa qalAAD.
5. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu ka kaalmayn karaa hay'adaha maaliyadda xagga qaabka hawlgelida iyo isku dubaradidka adeegyada iyo hawl fududaynta.

**QODOBKA 91'AAD**

**QODOBO QUBANE AH (MISCELLANEOUS)**

1. Ruqsadaha loo baahan yahay sida ku xusan qodobada 87 iyo 90 waa in la soo codsan karaa, la bixin karaa, la burin karaa ama la diidi karaa si waafaqsan shuruucda iyo nidaamka loo dejiyey.
2. Bixinta iyo diiwaangelinta ruqsadan oo kale, waxay ka koobnaanaysaa:
   B) In lagu qoro diiwaanka guud.
   T) Ruqsad ama shahaado diiwaangalineed oo uu soo saaray Baanka Dhexe ee Somaliland.

3. Qoraalka diiwaanka iyo shahaadadu waa inay cayimaan habka ama adeega ruqsadda qofka loo siiyey.
4. Hay'adaha hoos ku xusan waa inay ka reebanadaan in looga baahdo ruqsad ama diiwangelin sida ku cad qodobada 87aad iyo 90aad.

   B) Baanka Somaliland

   T) Baananka

5. Hawlwadeenada hababka lacagta iyo adeeg bixiyeyaasha lacagtu ( money service providers) waa inay raacaan shuruucda khuseysa sharciga ama qaynuunka Baanka Dhexe ee Somaliland, si gaar ahna waa inay:-

   B) Ururiyaan qabyotiraan xogta ku saabsan macaamiishooda qaabka iyo tafaasiisha ay dhigayaan shuruudaha arrintaa la xidhiidha.

   T) Bixiyaan xogta looga baahan yahay ee la xidhiidha macaamiishooda, maareynta maamulka, ganacsiga iyo xaaladooda maaliyadeed iyadoo u qaabaysan una faahfaahsan sida uu dhigayo Xeerka Baanka Dhexe ee Somaliland.

6. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu kala noqon karaa ruqsada iyo diiwangelinta hawlwadeenada habka lacag bixinta ama bixiyaasha adeegyada lacagta haddii Baanka Dhexe ee Somaliland ogAADo in

hawlwadeenada habka lacag bixinta ama bixiyeyaasha adeegyada lacagtu ay ka baaqsadeen inay raacaan qayb ka mid ah xeerka Baanka Dhexe ee Somaliland ama xeer hoosaadka uu baanku soo saaray ee raacsan xeerkan ama uu masalufo ama uu galo falal danbiyeed ama ay jiraan astaamo lagaga shakiyi karo hawlwadeenada habka lacag bixinta ama bixiyaha adeega lacagtu uu ku jiro falal dambiyeed.

## CUTUBKA 11'AAD
## ADEEGYADA DAMAANNADAHA IYO HABABKA WAREEJINTA DAMAANNADAHA
## QODOBKA 92'AAD

### DIIWAANGELINTA ADEEGYADA DAMAANNADAHA

1. Waa sharci darro in qof uu u galo si toos ah ama si dadban inuu bixiyo adeeg damaanadeedyada soo socda:
   b) Adeegyada iibsiga, iibka, ka ganacsiga, ilaalinta ama gudbinta damaannadaha.

   t) Adeegyada burburinta damaanado ama aalado kale oo maaliyadeed.

   j) Adeegyada ka hawlgalka iyo maamulka saylad maaliyadeed.
   x) Adeegyada lagu maalgashanayo damaanado laga helay bulshowaynta.

Kh) Adeeg kasta oo kale oo golaha wasiirada ee Somaliland cadeeyaan inuu yahay adeeg damaanadeed.

2. Qofka ka diiwangashan Baanka Dhexe ee Somaliland inuu yahay bixiye adeeg agab (Security Service provider) ama qof ka reebban diiwangelintaa sida ku xusan qodobka 93aad ee xeerkan ma saamaynayo sharcigani.

**QODOBKA 93'AAD**

**KA REEBANNAANTA SHURUUDAHA DIIWAANGELINTA**

1. Hay'adaha soo socdaa waxay ka reeban yihiin diiwaangelinta uu sheegayo qodobka 92aad:-

   B) Baank Dhexe ee Somaliland

   t) Baananka

2. Hayaduhu waxay ka reebannaan karaan diiwanglinta kaliya marka Baanka Dhexe ee Somaliland u arko in ka reebistu ay waafaqi karto ujeedooyinkeeda ku cad qodobka. 99aaD, ka reebitaanka uu bixiyo Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu yeelan Kara shardi ama wuu mudeysnaan karaa ama dhinac buu noqon karaa.
3. Waa inuu Baanka Dhexe ee Somaliland sheegaa Adeegyada damaanadu ay tahay hay'adaha kor ku xusani inay bixiyaan ama inaanay bixin sida ku cad farqada 1aad iyo 3aad ee qodobkan

## QODOBKA 94'AAD

## NIDAAMINTA, KORJOOGIDA IYO HEERARKA QIIMEYNTA

**(Regulation, supervision and prudential standards)**

1. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu mas'uul ka yahay sharciga iyo korjoogenimada adeeg bixiyeyaasha damaannadaha si waafaqsan ujeedooyinka ku cayiman qodobka 98.
2. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu hagi karaa bixiyeyaasha addeegyada agabka, Waxaa kaloo uu qaban karaa:
   b) Inuu u gudbiyo adeeg bixiyayaasha shuruudaha qiimeynta lagu bixinayo adeegyada agabka oo ay ku jiraan shuruudaha loogu talagalay inay noqdaan waddo loo maro adeegyada agabka iyo inuu ilaaliyo badbAADada hantida guud ee lagu aaminay.

   t) In uu Qiimo ahaan dalbado in bixiyeyaasha adeega agabka inuu uga warbixiyo dhaqdhaaqyada ka badan qadarka ugu yar ee ay goy'say waaxda ama hay'adaha ay khusayso.

3. Lacagaha iyo damaanaha lagu leeyahay adeeg bixiyaasha damaannadaha, taas oo aan Baan ku lahayn laakiin macaamiisheedu ku leedahay, looma isticmaali karo inay adeegbixiyeyaashu ku dayn baxaan.

## QODOBKA 95'AAD

## NAADADA IYO IIBKA DAMAANNADAHA XADIDAN

## (PUBLIC OFFER AND SALE OF SECURITIES RESTRICTED)

1. Waa mamnuucaa, in si toos ah ama si dadban, loo iibsado ama loo iibiyo damaanad ama inuu bixiyo adeega damaannadaha haddii aanay damaannadaasi ka diiwaangashanayn Baanka Dhexe ee Somaliland kuna jirin diiwaan guud, marka laga reebo xaalado iyo shuruudo uu baanku ku cayimay xeer nidaamineed (Regulation).
2. Baanka Soonaliland wuxuu ku soo rogi karaa shuruudo, meel kuhaynta diiwaangelintaas oo ay ku jirto shuruudo xogta guud ah oo ku saabsan damaannadaha iyo cidda soo saaraysa.
3. Baanka Dhexe ee Somaliland waa in uu ku Buriyaa diiwaangelinta damaanad sida damaanad hore loo ogolaaday xaaladaha soo socda;
   B) Haddii soo saaraha daamaanadu ka baaqsaday inuu u jiro sidii qof madax bannaan ama la cadeeyey inuu masalufay ama kacay.
   T) Haddii qiimaha suuqa ee damaanadu ka yar yahay **10,000,000 SLSh**
4. Dhaqdhaqaaq lagu kala iibsanayo damaanad aan diiwaangashanayn waxay noqonaysaa waxba Kama jiraan; haddii ay dhacdo xaalada noocaas ah ee damaannada lagu kala iibsaday,

waa in iibsadaha damaanadu u celiyaa iibiyaha isagoo dhaafsanaya oo la soo noqonayaa lacagtii uu ka bixiyey daamanda oo saafi ka ah khidmadihii, ujuurooyinkii iyo kharajyo kale.

## QODOBKA 96'AAD

## HABABKA WAREEJINTA DAMAANNADAHA

1. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu qaabeeyaa, qabyo tiraa korna u qaadaa habab damaanadeed oo sugan taabogalna ah.
2. Waxa mamnuuc ah in qofka aan ka haysan ruqsad Baanka Soomalilad inuu hawlgeliyo habka wareejinta dammnadaha,
3. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu mas'uul ka noqdaa ruqsadsiinta, xeer-nidaaminta iyo korjoogida hababka wareejinta damaannadaha iyo hawl wadeenada hababka wareejinta damaannadaha.
4. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu u soo gudbin karaa hababka wareejinta damaannadaha iyo halwadeenada hababka wareejinta damaannadaha:
   B) Shuruudaha qiimeynta iyo waxyaabaha looga baahan yahay, oo ay ku jiraan shuruudaha iyo waxyaabaha loogu talagalay in lagu fududeeyo korjoogenimada Baanka Dhexe ee Somaliland ee hababka wareejinta damaannadaha iyo hawl wadeenada hababka wareejinta damaannadaha iyo in la ilaaliyo badbaadada hantida umada ee lagu aaminay.

T) Inuu bixiyo sida loo dabaqayo iyo sida loo fulinayo heshiis laba dhinac ka dhexeeya ama dhinac saddexAAD ee qaybaha xeerka Baanka ee lagu dhamaystirayo wareejinta amarada dadka aan baan ahayn.

J) U qalmidda ka qaybqaadashada hababka wareejinta damaannadaha.

5. Shuruudaha ku yaal farqada 4aad ee qodobkan wuxuu si kala gedisan u saamayn karaa qaybaha hababka wareejinta damaannadaha iyo hawlwadeenada hababka wareejinta damaannada.
6. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu awood u leeyahay inuu u guto dhamaan hawlaha uu dhigayo farqada 1aad ee qodobkan hadba sida uu u arko inay u kala muhiimsan yihiin oo ay ka mid yihiin iyagoo aan la xadidneyn arimahan:

   b) Kor u qaadida, iskudubaridka, ka qaybqaadashada hababka wareejinta damaannadaha.

   t) Qabyotirka buugaagta xisaabaha deyn kala qaadashada hawlwadeenada hababka wareejinta damaannadaha iyo adeeg bixiyeyaasha damaannadaha iyagoo raacaya xaaladaha iyo shuruudaha sida uu dhigayo heshiiska lala leeyahay dadka xisaabaha leh.

   j) Siinta dadka xisaabaha ku leh waxyaabaha fududeeya casaynta (overdrafts) oo lagu sugay damaanado ku filan si waafaqsan shuruudaha xeer nidaameedka khuseeya arrinta.

7. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu fududeyn karaa:
   b) Isdhexgalka hababka isu gudbinta iyo deyn bixinta uu Baanka Dhexe ee Somaliland la leeyahay hababka damaanad wareejinta ee kale.
   t) Horumarinta qaabab cusub iyo teknolojiyado loogu talagalay wareejinta damaannadaha ee lacagaha gudaha iyo dibedaba.
   j) Qaabeynta iyo la qabsiga xiliyeysan qorshaha Socda ee tadawurka (evolution) habka wareejinta damaannadaha ee Somaliland.
8. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu soo saaraa xeer nidaamiye lagu maamulayo ilaalinta, xisaab-haynta iyo wareejinta damaannadaha deynta ay soo saareen dawladu ama Baanka Dhexe ee Somaliland iyo isugudbinta iyo dhaqdhaqaaqyada deyn-bixinta ee damaannadaha. Xeer nidaamyadani waa inay qaynuun u dejiyaan xaraashka damaandahan iyo anshaxa dillaallada.

## QODOBKA 97'AAD
## REEBANNAANTA QAYBSASHADA MASHAARIICDA AAN FAA'IIDADOODA LA HELIN (PYRAMID SCHEMES PROHIBITED)

1) Qofna waa inaanu si toosa ama si dadban u bilaabin, bixin, xayeysiin, fulin, maalgelin, maareyn, korjoogin ama agaasimin mashruuc faa'iido aan la helin loo qaybiyo ka-qaybqaatayaasha mashruucu ay inta badan ku xidhan tahay korodhka tirada xubnaha cusub

## QODOBKA 98'AAD
## QODOBO KALA DUWAN

1. Ruqsadaha iyo diiwaangelintooda ee raacsan qodobada 92aad iyo 98aad waa in lagu dabaqaa, la siiyaa ama lagala noqdaa, si waafaqsan hababka iyo nidaamyada ee lagu cayimay xeer nidaamiyaha khuseeya.
2. Ruqsad kasta ama diiwaangelitu waa inay ka koobnaataa:
   b) Gelinta diiwaanka guud ee Baanka Somaliland.
   t) Shahaadada ruqsada ama diiwaangelinta uu bixiyey Baanka Soomaliland.
   j) Diiwaangelinta iyo shahaadaduba waa inay cayimaan habka ama adeega iyo cidda ama qofka loo sameeyey ruqsada ama diiwaangelinta.
3. Adeeg bixiyeyaasha damaannadaha iyo hawlwadeenada hababka wareejinta damaannadaha waa inay u hogaansamaan sharciyada khuseeya iyo xeer nidaamyada iyo sidoo kale waa inay:
   b) Ururiyaan qabyo-tiraana kaydka xogta ku saabsan macaamiishooda si qaabkeeda iyo faahfaahinteeda lagu cayimo xeernidaamka.
   t) Siiyaan Baanka Dhexe ee Somaliland xogta uu u baahan yahay ee ku saabsan macaamiishooda, maareynta, maamulkooda, ganacsigooda iyo xaaladooda maaliyadeed si

qaabkeeda iyo faahfaahinteeda loogu cayimi xeernidaamka khuseeya.

4. Baanka Dhexe ee Somaliland wuu kala noqon karaa Ruqsada iyo diiwaangelinta adeeg bixiyeyaasha damaandaha ama hawlwadeenada wareejinta damaandaha haddii uu Baanka Dhexe ee Somaliland xaqiiqsado in adeeg bixiyaha daamanaduhu ama hawlwadeenka wareejinta damaanaduhu uu ka baaqsaday inuu qodobo ka mid ah xeerkan ama xeer nidaam raacsan xeerkan ama uu masalufay (insolvent), ama uu ku jiro falal-dembiyeed ama ay jiraan waxyaabo lagaga shakiyo in adeeg bixiyaha damaanaduhu iyo hawlwadeenka wareejinta damaanaduhu ku jiraan falal-dembiyeed.
5. Qofka si toos ah ama si dadban u sameeya fal la xidhiidha adeega damaannadaha ama habka wareejinta damaannadaha, falkaas oo la cadeeyey inuu sharci daro yahay ama aanu waafaqsanayn mid ama ka badan ujeedooyinka ku taxan qodobka 99AAD, isticmaala ama u ogaalada qof saddexaad inuu isticmaalo dhaqaale ama damaanado macaamiishu leedahay, ama sameeya tuugo ama khiyaamo waa in muteystaa xabsi aan ka badnayn laba sanno ama bixiyaa ganaax aan ka badnayn 20,000,000 SLSh ama labadaba; hanti kasta, lacagtu ku jirto oo loo isticmaalay ama lagu <u>helay sameeynta dembigaa waa in Baanka dhexe la wareegaa</u>

## QODOBKA 99AAD

## UJEEDOOYINKA DAMAANNADAHA

1) Marka uu fulinayo waajibaadkiisa cutubkani sheegayo, Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu hiigsadaa ujeedooyinka soo socda:
   b) Kor u qaadida kalsoonida lagu qabo iyo fahamka guud ee adeegyada damaannadaha, hababka wareejinta damaannadaha iyo sayladaha maaliyadda;
   t) Inuu ilaaliyo maalgashiyada damaannadaha.
   j) Inuu ka mamnuuco ashkhaas inay adeega damaannadaha u isticmaalaan fal-dembiyeed la xidhiidha tuugo ama daacad-darro, anshax xumo ama si khaldan loo isticmaalo xogta dhaqdhaqaaqa damaannadaha, ama wax si dembi lagu helay.

## CUTUBKA 12'AAD

## HAB-XISAAB MAAALIYADEEDKA IYO HANTIDHOWRKA WARBIXINADA

## QODOBKA 100'AAD

## SANNAD MAALIYADEEDKA.

1) Sannad maaliyadeedka Baanka Dhexe ee Somalilandwaa inuu ka bilaabmaa bisha January kowdeeda dhammAADana maalinta u danbeysa ee 31 Disembar isla sannadkaa.

**QODOBKA 101'AAD**
**QAABABKA XISAABAADKA**

1) Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu qabyo-tiraa xisaabaadka iyo kayd-qoraalada si ku filan inuu si joogto ah u waafajiyey hawlihiisa iyo xaaladiisa maaliyadeed heerarka caalamiga ah ee xisaabaadka.

**QODOBKA 102'AAD**

**WARBIXIN MAALIYADEEDKA**

1) Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu diyaariyaa warbixin maaliyadeedkiisa (financial statements) sannad maaliyadeed kasta.kuwasoo ay ka mid yihiin warbixinta dheelitirka (Balance Sheet) warbixinta dakhliga (income statement) iyo warbixinada kale ee la xidhiidha.

**QODOBKA 103'AAD**

**HANTIDHOWRKA XISAABAHA**

**1.** Baanka Dhexe ee Somalilandwaa inuu abuuraa qayb hantidhowrka gudaha ah oo si joogto ah uga hawlgasha dhaqdhaqaaqyada iyo xisaabaadka Baanka.
**2.** Madaxweynuhu isagoo la tashanaya Hantidhowraha guud haystana ogolaanshaha golaha wasiirada waa inuu magacaabaa sannad kasta mid ama ka badan oo ah hanti dhowrayaal madax bannaan oo dibeda ah inay baadhan xisaabaadka Baanka iyo inay

cadeeyaan dheelitirka, faa'iido iyo khasaaraha ee sannadlaha ah.

**3.** Xisaabaadka iyo kayd-qoraalada Baanka Dhexe ee Somaliland waa in loo baadhaa si waafaqsan heerarka caalamiga ah ee hantidhowrka.

## QODOBKA 104'AAD

## GUDBINTA IYO FAAFINTA CADEYMAHA IYO WARBIXINADA

1. Baanka Dhexe ee Somaliland, Saddexda bilood ee sanadka ugu horeeya gudahood waa inuu Golaha Wakiilada ugu soo gudbiyaa warbiximaha sanad maaliyadeedkii tegay oo ka kooban:

   b) Nuqul ka mida cadeymahiisa maaliyadeed ee ay cadeeyeen hantidhowrku.

   t) Nuqul ah warbixin ku saabsan hawlihiisa iyo xaaladiisa sannadkaa

   j) Warbixin xaaladda dhaqaale.

2. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu bil kasta dhammaadkeeda, 15 maalmood gudahood, diyaariyaa una gudbiyaa wasiirka maaliyadda odoroska cadeymaha dheelitirka. Warbixinada odoroska waa inay ku jiraan isbdelka saafiga ah dhigaalka lacagta qalaad mudadaa bisha ah.
3. Markuu soo gudbiyo, Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu faafiyaa cadeymaha maaliyadda iyo warbixinada lagu sheegay farqada 1aad iyo 2aad, wuxuu kaloo faafinayaa warbixinda kale iyo daraasadaha ku saabsan

xaaladaha maaliyadeed iyo dhaqaaale hadba sida uu arko habboonaantooda.

## QODOBKA 105'AAD
## KA WARBIXINTA SIYAASADA LACAGTA

1. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu qoraal warbixin ah ku siiyaa madaxweynaha iyo wasiirka maaliyadda waqti kasta haddii saafiga dhigaalka lacagta qalaad ee ku jirta xisaabaha Baanka Dhexe ee Somaliland ay hoos uga dhacdo in ka badan 30% muddo 7 maalmood ah .
2. Baanka Dhexe ee Somaliland Sannad kasta badhtamihiisa, waa inuu geeyaa Golaha Wakiilada soona saaraa cadeynta siyaasada oo koobsanaysa:

   b) qeexida iyo sharaxaada sababaha uu Baanka Dhexe ee Somaliland u raacayo siyaasadaha lacagta lixda bilood ee soo socda.

   t) Qeexida mabaadi'da Baanka Dhexe ee Somaliland soo jeediyay in loo raaco qaadashada iyo fulinta siyaasada lacagta labada sanno ee soo socda ama muddo intaa ka badan.

   j) Dib-u-eegis iyo qiimeyn uu Baanka Dhexe ee Somaliland ku sameeyo siyaasada lacagta ee la xidhiidhay cadeyntii u danbeysay ee lix bilood laha ahaa.

## CUTUBKA 13'AAD
## GUDDIGA XALLINTA KHILAAFAADKA MAALIYADEED
## QODOBKA 106'AAD

### SAMAYNTA GUDIDDA

Xeerkani wuxuu ogolyahay in la abuuro guddi xalinta khilaafaadka maaliyadeed kaasoo baadhi doona xaaladaha khilaafaadka maaliyadeed iyagoo qaab dhex-dhexaadineed samaynaya ka hor inta aanay maxkamad gaadhin

## QODOBKA 107'AAD

### AWOODA GUDDIGA

1. Guddigu wuxuu awood u leeyahay in dib u eegis ku sameeyo go'aanada iyo awaamiirta soo socda ee Baanka Dhexe ee Somaliland.
   a) Go'aamada Baanka Dhexe ee Somaliland ku diiday codsi ruqsad ama diiwangelin.
   b) Go'aamada shardi ama caqabad lagu xidhay ruqsad ama diiwangelin.
   c) Go'aamada ruqsad ama diiwangalin lala noqday.
   d) Go'aamada uu Baanka Dhexe ee Somaliland ku soo rogay magdhaw khasaare ama ganaax lacageed.
   e) Awaamiirta uu Baanka Dhexe ee Somaliland ka soo saaro qof ku jira hawl aanu ruqsad u haysan ama ka diiwaangashaneyn Baanka Dhexe ee Somaliland, inkastoo ruqsaddaa iyo diiwaangelintaa sharcigu dhigayo.

f) Go'aanada uu Baanka Dhexe ee Somaliland ku magacaabayo ( conservator)
g) Iyo wixii hawlokale ee sharcigu u igmado Guddiga

2. Guddigu waa inuu awood xukun (jurisdiction) u leeyahay inuu derso codsiyada furashada ama tallabooyinka musalifka (bankruptcy Proceedings) ee Baan ka yimaada iyo inuu hawlahaa hago.
3. Guddigu wuxuu awood u leeyahay inuu go'aan ka gAADho khilaaf kasta oo maliyadeed oo u dhexeeya hay'ado maaliyadeed oo loo soo wareejiyo Guddiga taas raacsan heshiis hore oo qoraal ah oo la xidhiidha xalinta khilaafaadka.

**QODOBKA 108'AAD**

**HAB-DHISKA GUDDIGA**

1. Guddigu waa inuu ka koobmaa:
   a) Laba garyaqaan uu madaxwayhuhu magacaabo uu ku xidhan inuu soo bandhigo gudoomiyaha Baanku.
   b) Laba khabiir ama aqoonyahan oo aqoon u leh qaab maaliyeedka Islaamka ama shareecada Islaamka.
   c) Laba xisaabiye/ aqoonyahan oo khibrad u leh hawlaha maaliyadda oo uu madaxwaynuhu magacaabayo ka dib soo jeedinta wasiirka maaliyada
   d) Shaqaalaha maamul hadba sida loogu baahdo
2. Madaxweynuhu waa inuu madaxa Guddiga ka doorta mid ka mid ah labada garyaqaan marka uu soo jeediyo gudoomiyaha baanku.

3. Qofna waa inaanu noqon xubin aqoonyahan ah oo Guddiga ka tirsan.
    a) Haddii aanu ahayn muwaadin Somaliland.
    b) Haddii aanu ahayn qof loo aqoonsday shaqsiyad wanaag.
    c) Haddii Laga xanibay xuquuq siyaasadeed ama madani ah
    d) Inta uu ka mid yahay gudiddamaamul ee Baan ama uu yahay shaqaale Baanka Somaliland
    e) Da'adiisu ka yartahay 35 sano xilliga magacaabida.
4. Xubnaha Guddiga waa inaan Guddiga looga saarin xaaladaha lagu sheegay tuduc 3aad mooyaane ama xukun ku dhaco ama hawsha laga fadhiisiyo ama go'aan maxkamadeed sheego daacad daradiisa.
5. Xubnaha aqoonyahandu waxay Guddiga ka tirsanaanayaan ilaa cimriga 70 sanno. Waxay iska casili karaan xubinimada inta ka horeysa cimrigaa isago soo badhingaya duruufaha shaqsiyadeed ee uga fadhiisanayo hawsha.

## QODOBKA 109'AAD

## DIIWAANGELINTA HANTIDA IYO KA MAQNAANSHAHA XALINTA KHILAAFKA.

1. Marka la magaacabayo, xubinta aqoonyahanka ee guddigu waa inuu diiwaangeliyaa hantidiisa warqada diiwaanka.
2. Warqaddaa lagu diiwangeliyey waa in Sannadksta ay qiimeeyaan guddi u

magacaabay Baanka Dhexe ee Somaliland, Wasiirka maaliyadda iyo Golaha Wasiirada, wakiil ka socda golaha wasiirada waa inuu madax ka noqdaa qiimeyntaas.

3. Haddii ay dhacdo in xubuni daneyso dacwad loo soo gudbiyey Guddiga waa inuu diidaa inuu ka qaybqaato qiimeynta xaladaas, xaladaas noocaas, khilaafka waa inay xaliyaan xubnaha kale ee Guddiga haddii kale waa in go'aanka Guddiga wax kama jiraan ahaadaan.
4. Xubnaha aqoonyahanada ah ama shaqaalaha maamulka ee Guddiga waa inaanu midna aqbalin hadiyad ama amaah qof dhinac ah dacwad ama qaraabadiisa ama qof xidhiidh dhaqaale u leh dhinac dacwada ka mid ah.

## QODOBKA 110'AAD

## WAAJIBAADKA XUBNAHA GUDIDDA

Xubnaha aqoonyahanada ee guddigu wuxuu ka mas'uul noqonayaan:

a) Dhawrista xogta sirta ah ee la xidhiidha shaqadiisa ilaa maxkamdu caddeyso taa lidkeeda.
b) Ka gaabsiga inuu ku isticmaalo xogta hawshu leedahay dano gaar ah ama qof kale u ogolaado inuu sidaas yeelo.

## QODOBKA 111'AAD

## GOOBTA IYO SHURRUUCDA NIDAAMKA GUDDIGA

Bil gudaheed marka la dhiso Guddigan waxa ku waajibay inay dejiyaan qaab nidaameed ama qodob

tixraac una bandhigta Guddigaa agaasimyaasha ee Baanka Dhexe ee Somaliland si ay u ogolaadaan.

## QODOBKA 112'AAD

## YEEDHMO

Guddigu wuxuu codsi yeedhmo udiri qof inuu horyimAADo Guddiga taas oo la xidhiidha dacwad khilaaf oo Guddiga loo soo gudbiyey taas oo dadka loo yeedhay ku waajibisay inay keenaan qoraalo iyo cadaymaha loo baahan yahay. Qofkastaa oo lid ku noqda sharcigaa waa inuu mutaystaa ganaax

## QODOBKA 113'AAD

## GO'AAMAADA GUDDIGA

1. Guddiggu markuu go'aanka qaadanayo wuxuu tixgelinayaa:
    a) Inta badan xubnaha guddigu go'aanka ay qaataan
    b) Go'aanada guddigu waa inay ku salaysnadaan caqliyad iyo cadaymo waa inay waafaqsanadaan sharciga
    c) Go'aanada guddigu waa in guddigu saxeexaan kaydna la geliyaa
    d) Go'aamadu markay soo baxaan waa in nuqul loo diraa dhinacyada khilaafka
3. Dhinacyada khilaafku way diidi karaan go'aamada gudidga laga bilaabo marka ay ka war helaan waxayna u gudbin karaan hay'adaha cadaalada si ay khilaafkaa u xaliyaan.

4. Guddigu waa inu wax kama jiraan ka dhigaa ama wax ka bedelaa go'an ama amar marka ay jiraan xaaladaha soo socda:
   a. Haddii Baanka Dhexe ee Somaliland ku xad gudbo awoodiisa sharci marka go'aan ama amar soo baxayo.
   b. Haddii Baanka Dhexe ee Somaliland raaci waayo go'aamadiisa ama soo saarista amarro aan khuseyn shuruucda iyo nidaamka
5. Guddigu waa inuu raacaa sida soo socota marka uu burinayo ama wax ka bedelayo go'aan ama amar uu leeyahay Baanka Sonmaliland.
   a. Qeexida asbaabaha lagu sheegay qaybta 4AAD ee qodobkan iyo sida loo saxayo,
   b. Inuu cayimo taariikh kama daymbays ah oo la dabaqayo go'aanka Guddiga.
6. Haddii Baanka Dhexe ee Somaliland u dhaqmo si aan waafaqsanayn go'aanka gudidga:
   a. Go'aanada la qaato iyo amarada Baanku soo saaro waa in la fuliyaa ilaa inta guddigu ka soo saarayo amar lagu burinayo ama jiritaankiisa dhamaanayo.
   b. Go'aan uu leayahay Baanka Dhexe ee Somaliland oo dib loo qaatay oo guddigii ka soo saaray burin ama wax ka bedelid go'aan guddi waa la diidi karaa mar labaad.

## QODOBKA 114'AAD

## DIIDMADA GO'AAMADA IYO AMARADA

Diidmada waa in loo qiimeeyaa sida soo socota:

1. Diidmada go'aamada iyo amarada Baanka Dhexe ee Somalilandwaa inuu keenaa qofka lagu sheegay go'aanka ama amarka, iyadoo qoraal lix bilood gudahood markuu Guddiga kasoo baxo.
2. Diidmadu waa inay wadataa sababo cayiman oo lagu burinayo ama lagu bedelayo go'aankii ama amarkii soo baxay.
3. Qof maamul ahaan mas'uulka uga ah Guddiga waa inuu gaadhsiiyaa guddoomiyaha Guddiga dhinacyadana qoraal ku wargeliyaa taariikhda degaysiga dacwada una dira nuqul qoraalkaas ah Baanka Soomaliland.
4. Guddigu waa inuu ku buriyaa ama wax kaga bedelaa go'aanka ama amarka marka ay jiraan xaaladaha soo socda:
   a. Haddii uu Baanka Dhexe ee Somalilandku xadgudbay awoodiisa sharci markuu go'aanka ama amarka soo saarayey.
   b. Haddii aanu Baanka Dhexe ee Somalilandu raacin go'aamadiisa ama amaraduu soo saaray shurruucda iyo nidaamka khuseeya.
5. Guddigu waa inuu raacaa sida soo socota marka uu go'aaminayo burinta ama wax ka bedelka go'aanka ama amarka Baanka Soomaliland.

a. Inuu qeexo sababaha lagu sheegay qaybta 4AAD ee qodobkan iyo sida loo saxayo
b. In la go'aamiyo taariikhda kama danbeysta ee la dabaqayo go'aanka Guddiga.

6. Haddii Baanka Dhexe ee Somalilandyeelo sida go'aanka guddigu sheegayo:
    a. Go'aamada iyo amaradda Baanka Dhexe ee SomalilandSoo saaray waa in la fuliyaa ilaa inta ay guddigu amrayo in la buriyo ama wax laga bedelo ama waqtiga jiritaankiisu uu dhammaanayo.
    b. Go'aanka ama amarka Baanka Dhexe ee Somalilandee mar labaad la qaatay ka dib markii la buriyey ama wax lagaga bedelay go'aankii guddigu soo saaray waa la diidi karaa mar labaad.

## CUTUBKA 14'AAD

## HABKA GANACSIGI-MAALIYADEEDKA ISLAAMKA GOLAHA LA TASHIGA SHAREECADA

### QODOBKA 115'AAD

### QAABKA GOLAHA LA TASHIGA SHAREECADA

1. Baangu wuxuu dhisayaa golaha la tashiga shareecada ee habka maaliyadda Islaamka taas oo ah hay'adda hubinta ku dhaqanka shareecada hawlaha ganacsiga Islaamka ee maaliyadeed
2. Golaha la tashiga shareecadu isagaa samaysanayaa nidaamkiisa

## QODOBKA 116'AAD

## HAWLAHA GOLAHA LA TASHIGA SHAREECADA

1. Golaha la tashiga shareecada wuxuu yeelanayaa hawlaha soo socda:
   a) Hubinta ku dhaqanka shareecada Islaamka xaalad kasta oo maaliyadeed ama xukunka marka arrintaa wax laga weydiiyo.
   b) La talinta Baanka xaalad shareeco oo la xidhiidha hab maaliyadeedka ganacsiga Islaamka, hawlaha ama dhaqdhaqaaqyada Baanka.
   c) Inuu talo siiyo hay'ad kasta oo maaliyadeed oo islaami ah ama qofkii kale ee u baahda.
   d) Ama hawlo kale ee ganacsi Baangu go'aamiyo.
2. Markaa qaybtan laga hadlayo xukun Waxaa loo lala jeedaa go'aamada ay golaha la tashiga shareecada islaamku ka gaadhaan hubinta ku dhaqanka shareecada ee hab maaliyadeedka Islaamka.

## QODOBKA 117'AAD

## MAGACAABISTA XUBNAHA GOLAHA LA TASHIGA SHAREECADA

## (APPOINTMENT OF MEMBERS TO SHARIAH ADVISORY COUNCIL)

1. Madaxwaynaha waddanku isagoo ka duulaya talada wasiirka maaliyadda iyo talada Baanka wuxuu magacaabayaa toddoba xubnood oo

isku darsaday xeeldheeri xagga shareecada ah iyo habka baananku u shaqeeyaan inay ahaadaan golaha la tashiga shareecada.

2. Xubinta golaha ee lagu doortay sida lagu xusay qaybta koowAAD waxay ka mid ahaanaysaa Guddigaa shuruudaha iyo qodobada lagu caddeeyey warqada magaacabista, xubin kastaa dib baa loo soo dooran karaa.
3. Xubnaha golaha la tashiga shareecada waxa mushaharka iyo gunnooyinka loo siinayaa sida ay go'aamiyaan Guddiga Baanku

**QODOBKA 118'AAD**

**XOGHAYNTA GOLAHA LA TASHIGA SHAREECADA**

**Banku wuxuu**

a) Dhisi karayaa xoghayn ama guddiyo haddi uu arko inay tahay lagama maarmaan inay taageri karayaan in goluhu guto hawlihiisa
b) U magacaabi karayaa sarkaal kasta oo Baanka ka tirsan ama qofkasta oo kale inuu noqdo xoghayn ama ka mid noqdo guddiyadda.

**QODOBKA 119'AAD**

**WADA TASHIGA BAANKA, HAY'ADAHA MAALIYADEED EE ISLAAMKA IYO GOLAHA LA TASHIGA SHAREECADA**

**1.** Baanku waa inuu talo ka weydiiyaa golaha la tashiga shareecada xaalad kastaoo la xidhiidha:
   **a.** Hawlaha maaliyadda Islaamka

b. Si ay gudato hawlaheeda ama ganacsigeeda una wadato si waafaqsan xeerkan ama sharci qoran oo waafaqsan shareecada taas oo u baahan in shareecadnimadeeda uu hubiyo golaha la tashiga shareecada.

2. Hay'ad kasta oo maaliyadeed oo islaami ah marka loo eego hab maaliyadeedka ganacsiga islaamiga ah waxay:
   a) Tixraaci go'aanka;ama
   b) Inay kala tashato golaha la tashiga shareecada hawlaheeda ganacsi si ay isaga hubiso inay ku taagan tahay ku dhaqanka shareecada Islaamka.

**QODOBKA 120'AAD**

**TIXRAACA GOLAHA LA TASHIGA SHAREECADA GO'AAN MAXKAMADA AMA DHEXDHEXAADIYE**

1. Marka su'aal shareecada la xidhiidha ka dhalato dacwad maxkamad ka socota oo khuseeya hab maaliyadeed ka ganacsiga islaamiga ah, maxkamadu ama dhexdhexaadiyuhu wuxuuu
   a) Tixgelin siinayaa go'aamo uu qoraal ku faafiyey golaha la tashiga shareecadu; ama.
   b) Inay su'aashaas oo kale u eegaan golaha la tashiga shareecada xukunkeeda.
2. Codsi kasta oo talo lagaga doonayo ama go'aan la xidhiidha xeerkan ama xeer kasta oo kale Waxaa loo soo gudbinayaa xoghaynta golaha.

## QODOBKA 121'AAD

## SAAMEYNTA GO'AAMADA SHAREECADA AH

## (EFFECT OF SHARIA RULINGS)

Go'aankasta oo ka soo baxa golaha la tashiga shareecada oo la xidhiidha tixraac kuxusan qodobka 119aad wuxuu qabanayaa hay'adaha maaliyadeed ee islaamiga, maxkamadaha ama dhexdhexAADiye, iyadoo la tixraacayo qaybta 56aad.

## QODOBOKA 122'AAD

## KORAYNTA GO'AANKA GOLAHA LA TASHIGA SHAREECADA

1. Haddii ay dhacdo in ay go'aan uu guddi shareeco oo ka jira Somaliland ku soo rogtay Hay'ad maaliyadeed oo islaami ah uu ka duwaanado go'aanka golaha la tashiga shareecadu go'aanka golaha la tashiga shareecada ayaa mudan in la koryeelo

2. Hadii golayaasha shareecada ee Baanka Dhexe iyo Baananka gaarka loo leeyahay isku qabtaan masalo sharci ah waxa kala saaraya Guddi culimo oo dhexdhexaad ah.

## QODOBKA 123'AAD

## SOO SAARIDA BAANKA EE WAREEGTOOYIN IYO TILMAAMO ARRIMAHA SHAREECADA

1. Baangu wuxuu soo saari karaa wareegtooyin qoraal ah tilmaamo iyo ogeysiis arrin shareeeco

oo la xidhiidha hab maaliyadeedka ganacsiga Islaamka ah oo ay tahay inay fuliyaan hay'adaha maaliyadeed islaami ah si waafaqsan talada iyo go'aanka golaha la tashiga shareecada Islaamka.

2. Hay'ad maaliyadeed islaami ahi waa inay raacdaa wareegtooyin qoraal ah tilmaamo ama wargelin uu soo saaray Baangu sida ku xusan qayb-xigaha 1aad iyo mudada cayiman.
3. Qof kasta oo ka baaqsada inuu raaco wareegtooyinka tilmaamaha ama wargelinaha sida ku cad qayb-xigaha (1) wuxuu ku jiraa denbi haddii uu ku cadaadana wuxuu mutaysanayaa ganaax aan ka badnayn 50,000,000 SL. Sh

## QODOBKA 124'AAD
## KOR U-QAADIDA SOMALILAND, SI SY NOQOTO XARUNTA CAALAMIGA AH EE HAB MAALIYADEEDKA ISLAAMIGA AH

1. Baangu isagoo kaashanaya dawladda ama hay'ad dawladeed hay'ayad qaynuun, hay'ad maareyn, hay'ad caalami ah inay horumariso iyo inay u kobciso sida Somaliland xarun caalami ah ee hab maaliyadeedka islaami ah u noqon lahayd.
2. Iyadoo la eegayo ujeedada ku xusan farqada 1aad Baanku wuxuu:
   b. Dhisi karaa xoghayn ama guddiyo ka caawiya dawladda ama urur gole, wakaalad ama guddi ay dawladdu samaysay

t. Guud ahaan qaado tallaabooyin arrinta lagu suurtogelinayo maalgaliyo horumarinta iyo kobcinta Somaliland si ay u noqoto xarunta hab maaliyadeedka islaamiga ah.

**CUTUBKA 15'AAD**

**Miscellaneous Provisions**

**QODOBKA 125'AAD**

**XUQUUQDA MUDNAANTA**

1. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu yeeshaa xuquuqda inuu sheegashadiisa ka daboolo lacag hadhaa ah ee ku jirta xisaab uu leeyahay deynsane, Baanka deyn ka qaba. Hantidaasi waa Inay rahan u noqotaa si loo xaqiijiyo Baanka Sheegashadiisa. Marka ay gaadho xilliga daynta banku wuxuu hantidaa ku dabooli karaa sheegashada dayntiisa. Hantida Baanka Dhexe ee Somaliland sidii dhigaal ahaan u taal looga baahan yahay way ka reebban tahay arrintaa.
2. Bankiga Somaliland wuxuu isticmaali karayaa xuquuqda mudnaanta keliya inuu qaato lacagta caddaanka ee hadhaaga ah ama inuu ku iibiyo hantida uu deynsanuhu leeyahay qiime macquul ah marka kharajka iibka ku baxaya laga jarona inuu bankigu ka goosanayo deyntiisa. Waa in aanay jirin sheegasho kale oo mulkiyadeed oo xayiri karta in Banku guto xuquuqdiisa mudnaanta ilaa ay jirto in shaqaalaha Baanka Somaliland ogyihiin in hantidaasi uusan lahayn deynsanuhu.

## QODOBKA 126'AAD

## HAWLQABADKA LA MAMNUUCAY.

1. Ilaa ogolaansho sharci loo helo, Baanka Dhexe ee Somaliland waa in aanu:
   - b. U fidin taageero maaliyadeed ha amah toos ah, ama balanqaad dhacdo ku xiran ama aanu amah iibsan, amaah ka qayb qaadan, aqbalin deyn ama aanu gelin hawlqabad Baan sida lagu sifeeyey xeerka Baanka.
   - T. Gelin ganacsi, iibsan saamaiyo shirkadeed oo ay ku jiraan saamiyada hay'ada maaliyadeed ama mulkiyad ku yeelan hawlo maaliyadeed, ganacsi, beero, warshado ama hawlo noocaas oo kale.
   - j. Ku hantiyin sifo iibi, kiro ama si kale hanti ma guurto ah, marka laga reebo in hantidaasi lagama maarmaan u noqoto hawlaha iyo maamulka Baanka ama in hantidaasi hoy u noqoto shaqaalaha Baanka ama waxyaabo la mid ah oo uu xeerka baanku ogol yahay.
2. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu sameyn karayaa:
   - b. Inuu amaah siiyo ama mulkiyad ku yeesho ama ka qaybqaato hay'ad ka qaybqaadashadeeda uu Baanka Dhexe ee Somaliland uga baahan yahay shaqadiisa ama mas'uuliyadiisa.

t. Inuu yeesho mulkiyad ama xuquuq uu deyn ku daboolayo, iyadoo ay mulkiyadaa sidaa loo yeeshay la wareejiin karo.

j. Inuu abuuro sanduuqa hawlgabka shaqaalaha ama hawlo la mid ah oo uu ugu daneynayo shaqaalihiisa iyo dadka ay mas'uulka ka yihiin iyo dhaqale ku biiriyo kharajka sanduuqaa ku baxaya taas oo loo eegayo shuruudo arrintaa loo dhigay.

x. Inuu abuuro barnaamij shaqaalaha amaah lagu siinay si wax uga qabsadaan xagga hoyga, caafimAADka iyo waxbarashada ama waxbarashada caruurtooda.

## QODOBKA 127'AAD

## URURINTA XOGTA TIRO KOOBKA

1. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu kasoo urursadaa hay'adaha ku shaqada leh hawlahaa xogta tirakoobka ee ay uga bahan tahay in guto waajibaadkiisa, si taa loo gaadho inuu Baangu iskaashi la sameeyo hay'adaha arrintaa ku shaqada leh ee ka dhisan dalal kale ama hay'adaha caalamiga ah.
2. Baanka Dhexe ee Somaliland waa in uu wax ku biiriyaa isku dubaridka shuruucda iyo qabaabka xog ururinta, soo saarista iyo qaybinta xogta meelaha looga baahan yahay.
3. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu sharci ku qeexaa qaabka xogta tiro koobka Baanka loogu soo gudbinayo dadka Baangu ka helayo

xogta tirokoobka iyo sirta ay yeelanayso xogta tirokoobka Baanka Dhexe ee Somaliland.

4. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu codsan kara in Baanyada ka hawlgalaa Somaliland ay siiyaan Baanka Dhexe ee Somaliland warbixin sanadeed, saddex bilood leh ama muddo ka yar oo ka hadlaysa tiro koobka lacageed, warbixinada dakhliga iyo kharajka amaahda aan shaqaynayn iyo khasaaraha ka yimAADa amaahda, heerka lacagta qalaad, qadarka dheef korka iyo warbixinada kale ee hawlaha Baanka la xidhiidha. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu isku waajibayaa inuu tirokoobka ku soo saaro si waafaqsan heerarka iyo qaababka caalamiga ah.
5. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu codsan karaa in hay'adaha maaliyadeed ee Baan ahayni iyo wakiilada la hawlgala Somaliland inay usoo gudbiyaan Baanka Dhexe ee Somaliland warbixin tirokoob oo sanadle ah saddex bilood leh ama muddo ka dhow.
6. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu u soo saari karaa ama isugu geyn karaa xogta tirokoob ee uu ka helay Baanyada ama hay'adaha maaliyadeed ee kale si waafaqsan siyaasadiisa Baana loona, bandhigo dadwaynaha iyadoo la fulinayo shuruudaha hay'adaha caalamiga ah.
7. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu codsan karaa in Baanyada iyo wakaaladaha hay'adaha maaliyadeed ee kale inay Baanka Dhexe ee Somaliland siiyaan xog ku saabsan

dhadhaqaaqyo gaar ah, shaqsiyaad ama shirkado haddii xogtaa looga baahdo korjoogenimo siyaasadda ama hawlgudashada tirokoobka.

8. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inaanu faafin xog tirokoob oo ka waramaysa xidhiidh ganacsi oo Baanku la leeyahay shaqsiyaad ama heshiisyo uu cid kale la galay haddi aanu marka hore oggolaansho ka helin shaqsiyaadka ama cidda heshiishyadasi khuseeyaan.
9. Baanka Dhexe ee Somaliland isagoo dhawrayaa garsoonimada xogta diiwaangashan ee la xidhiidha dhaqdhaqaaqyo cayiman shaqsiyaad ama shirkado, wuxuu siin karaa xogta korjoogeyaasha ama xafiisyada ee khuseeya si ay hawlahooda uga fushadaan.
10. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu xayiraad saari karaa Baanyada, hayadaha maaliyadda iyo wakiilada haddii ay dhacdo inay warbixin soo gudbin waayaan ama ay soo gudbiyaan warbixin aan sax ahayn.
11. Qofkasta oo ka socda Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu ururin xogta tirokoobka si waafaqsan qodobkan waana in xogtaasi kaga baxdaa sida shuruucda arrintaa la xidhiidha ogoshahay. Haddii sidaa laga baaqsado, waxaa la mutaysanayaa xadhig ilaa lix bilood ah ama ganaax dhan 12,000,000 SL.Sh ama labadaba.

**QODOBKA 128'AAD**

**DHOWRSANAANTA**

1. Qofna waa inaan loo raaci Karin fal dhaawac ama tirtirid isagoo gudanayaa shaqadiisa marka xeerkan la eego, qofkaas oo noqon karaa xubin Guddiga agaasimayaasha, Gudoomiye, Gudoomiye- xigeen, Agaasime guud sarkaal ama xubin shaqaalaha ka mid ama isagoo ah sii-haye lagu magacaabay si waafaqsan xeerkan ama xeerka Baanyada ilaa la muujinayo falkaa ama tirtiradaa in aanu ku dhicin niyadsami.

2. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu ka reebanadaa:
   b. Cashuurta macalmacaashka
   t. Cashuurta hantida gaar ahaaneed.
   j. Cashuurta wareejinta lacag sanduq iyo dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed ee kale.
   x. Cashuurta boolada (Stamp duty) ee lagu saarayo saamiyada iyo lacagta waraaqaha ee Baank.

**CUTUBKA 16'AAD**

**QAABKA, UJEEDOOYINKA IYO WAAJIBAADKA**

**Qodobka 129'AAD**

**HEERARKA MAAMULKA WANAAGSAN**

1. Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu fuliyaa ujeedooyinkiisa si sharciga waafaqsan.
2. Go'aanada Baanka Dhexe ee Somaliland waa in aanay dhinac raacsanayn sida sharcigu dhigayo.

3. Marka uu gudanayo hawlihiisa ama adeega bixinayo, Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu tixgeliyaa danaha isagoo sharciga ilaalinaya.

## QODOBKA 130'AAD

## XISAABAADKA LA ISKU AAMINAY EE GAARKA AH

## (TRUST ACCOUNTS)

Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu ka furayaa xafiisyadiisa (Trust Accounts) si uu ugu maamulo Baanka Dhexe ee Somaliland dhaqaale ay qolyo shisheeye ah ugu caawiyeen dawladda ama hay'ad dawladdu leedahay si waafaqsan shuruudaha ku xusan heshiiska xisaabta sanduuqa, Hantida ku jirta xisaabta sanduuqa Waxaa lagu saari karaa deyn xisaabta sanduuqa lagu yeeshay ama haddii lagu heshiiska xisaabta sanduuqa, waa in hanti Baanka Dhexe ee Somaliland leeyahay lagu bixiyo deyntaas, Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu khidmad saaraa inuu maamulka noocaas ah fulayo.

## QODOBKA 131'AAD

## DADKA RUQSAD HAYSTA IYO KUWA AAN DIIWANGASHANAYN

1. Baanka Dhexe ee Somaliland waa in awood loo siiyaa inuu baadho xisaabaadka buugaagta, qoraalada iyo diiwanada qof kasta, hadii qofkaasi ku jiro hawl aanu ruqsad u haysan ama uu diiwaangashayn, Xaaladha noocaas ah

hay'adaha sharci fulintu waa inay Baanka ku taageeraan.

2. Hadii qof hawl galo isagoon ruqsad u haysan una diiwangashayn, Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu ku amraa qofkasi inuu hawshaa ku joojiyo todobaad gudihii. Haddii taa ku xadgudbo, Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu arrintaa u gudbiyaa Guddiga. Guddigu wuxuu go'aamin karaa in hantida, buugaagta iyo diiwanada qofkaas laga qaado loona dhiibo Baanka Dhexe ee Somaliland. Todobaad gudihii marka laga soo bilaabo taariikhda go'aankeeda, guddigu waa inuu bilaabo taariikhda go'aankeeda guddigu waa inuu bilaabo dhageysiga arrintaa iyadoo ay goobjoog ka noqonayaan Baanka Dhexe ee Somaliland, qofka amarka lagu riday iyo ciddii kale ee danayneysa waa inay dhagaysiga ka qaybqataan. marka dhegaysigu dhammaado guddigu waa inuu go'aamiyo in hantida laga qaado sida wafaqsan xeerka Baanka, Haddii ay dhacdo in la iibiyo hantida lacagta soo baxda waxaa laga jarayaa kharajkii dacwada haddii dhibatooyin jireene dadka lahaa baa loo celinayaa hadhaaga waxa la siinayaa hantilihii ama dawladda ayaa la wareegaysa.

**QODOBKA 132'AAD**

**XADGUDUBYO**

Ku xadgudbida xeerkan, haddii aan la cayimin ciqaabta waxa loo raacayaa xeerka ciqaabta Somaliland.

**QODOBK 133'AAD**
**SHARCI DEJIN**

Baanka Dhexe ee Somaliland si uu qodobada xeerkan u dabaqo wuxuu ansixin karaa shuruuc.

**CUTUBKA 17'AAD**
**QODOBO KU MEEL GAADH AH**
**QODOBKA 134'AAD**
**FULINTA QANDARAASYO IYO DHAQ-DHAAQYO**

Qandaraas kasta, iib sharci, agab balanqaad ama dhaq-dhaqaaq kasta oo la xidhiidha lacag ama la xidhiidha deymo lacag lagu bixinayo hawl la fuliyey ama la sameeyey xeerkan ka hor waa in la fuliyaa

**QODOBKA 135'AAD**
**OGAYSIINTA BAANKA**

Adeega Bankiga ee hawlaha Baanka ganacsiga Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu ogeysiis ku joojiyaa inuu adeega Baanka Ganacsiga ku siiyo dadka xisaabta ku leh

**QODOBKA 136'AAD**
**GUDDIGA HANTIDHAWRKA EE MADAX BANNAAN**

1. Marka sannad ka soo wareego dhaqangalka xeerkan, Waxaa la dhisayaa guddi madax bannaan oo ka kooban khubaro wadani ah iyo kuwo caalami ah oo ay ku jiraan, hantidhowreyaal khubaro dhinca Baanka dhexe iyo khubaro kale oo ay lagama maarmaan u noqoto inay qiimeeyaan hantida iyo deymaha Baanka Dhexe ee Somaliland ee ay ku jiraan waxyaabaha aan sugnayn (contingencies) ee saamiyada ku jira shirkadaha dawladda iyo hantida ay ka mid tahay lacag caddaan ah iyo

dahab ku jira xisaab qalaad iyo inuu qaato warqadda dheelitirka (Balance Sheet) oo hantidhowrayaal caalami ahi ansixiyeen si waafaqsan heerarka caalamiga ee hanti dhowrka.

2. Iyadoo xogta laga duulayo, laga soo bilaabo aasaas-keeda, guddigu waa inuu shan bilood gudahooda ku soo jeediyaa:

3. Heerka raasamaal ee loo ogolyahay Baanka Dhexe ee Somaliland habka dhaqaalaha loogu qaybinayo xisaabaha dhigaalka leh.

4. Qaabka uu Baanka Dhexe ee Somaliland saamiyada ugala soo baxayo shirkadaha dawladda iyo dabagalka hantida kale.

5. Deymaha Baanka Dhexe ee Somaliland ku leeyahay dawladihii hore

**QODOBKA 137'AAD**
**XISAABAHA QALAAD EE U FURAN SHIRKADAHA**

Lix bilood gudahood marka sharcigani dhaqan galo, Baanka Dhexe ee Somaliland isagoo dhinac keliya ah waa inuu awood u yeeshaa inuu xidho oo dareeriyo (liquidate)) Xisaabaha ay u hayso Hay'adaha maaliaydeed ee qalaad ee wakiishay shirkadaha wadaniga ah dawladda iyo inuu tirtiro heshiisyada la xidhiidha xisaabaadka iyo inuu u celiyo hantida ku jirtay xisaabaadkaa. Wadarta saafiga ee hantida ah waa in Baanka Dhexe ee Somaliland soo saaraa isagoo isugeynaya hantida ku jirta xisaabaadkaa oo shillin Somaliland kana

jaraya wixii Baanka Dhexe ee Somaliland ku leeyahay xisaabaadkaa oo shillinka Somaliland ah. marka la xisaabinayo wadarta hantida ku jirta xisaabahaa waxaa la isticmaalayaa heerka sarifka ee maalintaa. Haddii deymaha xisaabaha lagu leeyahay ka bataan hantida xisaabaha ku jirta, dawladdu wa inay dheeraadka ku bixisaa lix bilood gudahood marka Baanka Dhexe ee Somaliland ogeysiiyo.

## QODODBKA 138'AAD
## SOO BADHIGIDA TARTIIB AH EE SHURUUDAHA QIIMEYNTA.

Baanka Dhexe ee Somaliland waa inuu awood u yeeshaa inuu sharci ku soo bandhigo si tartiib ah shuurdaha qiimeynta xeerka Baanyada Somaliland gudaheeda saddex sanno gudahood marka xeerkani dhaqan galo.

## QODOBKA 139'AAD
## DHAQANGALKA XEERKA

Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa marka ay ansixiyaan Golaha Wakiiladu madaxwaynuhuna saxeexo ee lagu soo saaro faafinta rasmiga ah.

***A***llaah Mahad leh

C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)
Guddoomiyaha Golaha Wakiiladda JSL.

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee
Golaha Wakiiladda JSL